PJ
2534
.C25
T33
1987



# TACLIIN & TALLAABO JACAYL

Qore: C/naasir Sh. Xasan Nageeye

" RIWAAYAD"

# TACLIIN IYO TALLAABO JACAYL

C/NAASIR SH.XASAN NEGEEYE
Cabdinaasir Sh. Xasan Negeeye

CURIS 1983

PJ
2534
C25
T33
1987

Sheekadani kuma lug laha, dad nool iyo kuwo dhintay midna, waxaa curiyay qoraha mana jirto cid ay si toos ah iyo si dadban midna u khusayso, waana dhacdo joota ah oo had iyo jeer ka dhex dhacda bulshada.

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

Daabacaaddii Koowaad 1985
Daabacaaddii labaad 1987

Waxaa daabacay Qoraha
Muqdisho/Soomaaliya 1987.



THE HECKMAN BINDERY, INC. N. MANCHESTER, INDIANA

drn

## HORDHAC

Sheekadan aan ugu magac daray"TACLIIN IYO TALLAABO JACAYL", waxaan hindisaheeda bilaabay 1983kii, aniga oo Macallin Shaqo Qaran ah.

Waxaan go'aansaday in aan Qisadan Riwaayad-da ah bulshada u soo bandhigo, kadib markii aan arkay waxyaabo badan, oo ay ku dhaqmaan Dhallin-yarada Qarniyadan dambe, aniga oo ku dadaalay sidii ay u fahmi lahayd cid kasta oo buuggan akh-risata, aniga oo tixgelin siiyay akhristayaal badan oo ay dhibaato ku tahay fahanka Geeraarada iyo Heesaha, waxaan buuggan u qoray hab fudud oo si dhib yar lagu fahmi karo Qisada uu xambaarsan-yahay, taasoo aan filayo in ay sheekadàni raalli gelin doonto akhristayaal fara badan, gaar ahaana kuwa jecel Suugaanta.

Qisada buuggani waa mid ku salaysan dhacdoo-yin joogta ah,oo had iyo jeer ka dhaca waddanka, gaar ahaan goobaha Waxbarashada, iyo dhallinyar-ada soo koraysa.

Buuggani wuxuu faahfaahin iyo talooyin ka bixinayaa habka loo dhalan rogay dhaqanka Soom-aaliyeed iyo dhibaatada keentay guur la'aanta.

Buuggani wuxuu wax wayn ka tarayaa hab qor-aalka riwaayadaheenna, wuxuuna u qoran yahay, hab casri ah oo soo jiidanaya akhristayaasha, taasoo aan oran karo wuxuu raalli gelinayaa dha-mmaanba akhristayaasha.



7/17/84

## BUUGAAGTA IYO QORAYAASHA TAXANAHA IFTIN

| | |
|---|---|
| 1. Qiso Kalgacal— | M.C.Gurxan |
| 2. Sooryo dhagareed— | C/Rashiid Guuleed iyo C/Shakuur M. Aadan |
| 3. Taclиin iyo Talaabo J. | C/Naasir SH. Xasan N. |
| 4. Xusuus Caashaq | C/Shakuur M. Aadan |
| 5. Shil Jacayl | Siciid Xaaji C/laahi |
| 6. Illin Jacayl | C/Qaadir M. (Cali B.) |
| 7. Ceeb Adduunyiyo Casroow lagu eed | Saciid Xaaji C/laahi |
| 8. Xushmad iyo Kalgacal | C/llaahi A. Busuri. |
| 9. Dhalanteed Jacayl | C/Shakuur M. Aadan |
| 10. Walaashay Shukri | M.C. Gurxan. |
| 11. Walaalo aan is aqoon | C/Naasir Sh. X.Negeeye. |

Dhamaan buugaagta kor ku qoran oo uu soo saaray Taxanaha Iftin waxaad ka heli kartaa meelaha buugaagta lagu gado.

F.G.

C/Naasir Sheekh Xasan Negeeye, wuxuu gacmo furan ku soo dhowaynayaa qof kasta, ama koox kasta oo diyaar u ah in ay buuggan TACLIIN IYO TALLAABO JACAYL, ka dhigto Filin ama Riwaayad waxayna kala soo xidhiidhi karaan Cinwaankan.

P.O.Box 7210
Muqdisho-Somalia.

# JILIYAASHA SHEEKADA.

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Daacad | Arday |
| 2. | Dayaca | Ardayad |
| 3. | Jamaal | Arday |
| 4. | Jamaad | Ardayad |
| 5. | Dage | Wiil Caasi ah |
| 6. | Hagarla' | Gabar Caasi ah |
| 7. | Dhaqane | Wiil dhowrsan |
| 9. | Mahad | Wiil dhowrsan |
| 10. | Haweeya | Gabar Caasi ah |
| 11. | Bilan | Gabar Caasi ah |
| 12. | Ayax | Nin Qamarji ah |
| 13. | Cambaro | Xaaska Ayax |
| 14. | Cawaale | Nin Tuug ah |
| 15. | Duufiye | Nin Tuug ah |
| 16. | Dhaanraac | Wiil Caasi ah |
| 17. | Maygaag | Nin Reer Miyi ah |
| 18. | Danayste | Nin Taajir Ah |
| 19. | Dhoohane | Wiil Caasi ah |
| 20. | Kayd | Bare Dugsi Sare |

Buugan looma rogi karo weji kale oo ka duwan kan uu ku soo baxay, lagumana samayn karo Ganacsi, iyadoo loo yeelayo waji kale, sida Jilid Sawirid, Daabacaad, Duubid IWM. Iyada oo aan laga haysan ogolaasho qoraal ah Mu'alifka Buugga.

C/Naasir Sh. Xasan Nageeye.
(QORAHA)

# ARAGA KOOWAAD

## DUGSI WAXBARASHO

Maalintu waxay ahayd Isniin, waqtiguna wuxuu ahaa abbaaraha 4:00, waabari ku dhawaadkii, waxaa sii dhammaanayay madowgii habeenimo, waxaana soo dhawaanayay, fallaarihii ifka waabari, ee Qoraxda.

Shanqadh iyo buuq toona lama maqlayn, waxaan ka ahayn shimbiro ced macaan iyo aadaanka Salaada Subax, kaasoo magaalada afarteeda gees ka yeerayay, dadka Muslimiinta ahna loogu yeerayay salaada subax, waxaa guryaha qaarkood ka baxaayay buuq iyo albaab garaacid, la isugu toosinayo Salaada subax.

Daacad oo ahaa Ardey akhlaaqad iyo asluub lagu soo barbaarshay, wuxuu toosay iyadoon ciddi toosin, wuxuuna horay u aaday Masaajid Xaafadeoda ku dhawaa, Daacad markuu soo tukaday Salaaddii Subax, wuxuu ku soo laabtay gurigoodii, wuxuuna isku diyaarsaday buugaagtiisii uu iskoolka la aadi lahaa, wuxuuna isha ku dhuftay quraac ay Hooyadii miiska u saartay, intuu salaada ku maqnaa quraacdii buuna si boobsiis ah ku cunay, waaye, maalintaa waxaa sugaysay howl weyn,

wuxuuna ku dag degsanaa iskoolkeoda, si uu indh-
aha u sii mariye khudbad subaxdaa laga sugaayay
isaga, waayo, waxaa khudbada iska lahaa fasalkeo-
da, waana khudbada caadiga ah ee ardeyda Dugsiye
adu ka jeediyaan safka Calanka hortiis. HD

Khudbadaas Daacad aad bay ugu habeysnayd, wuxuuna ku soo saleyay waxyaabo ka taagan Dugsigooda iyo dugsiyada kaleba ee magaalada, wuxuuna Khudbadaas cinwaan uga dhigay "Ku Dayashada Dhaqamo Shisheeye". Dugsiga uu Daacad dhigtaa waa Dugsiga Sare ee Saqaawadiin, sida caadada u ahaydna wuu u soo lugeyn jiray Dugsiga, waayo, wuxuu daganaa Xaafad aan saas uga dheereyn.

Nusaac ka bacdi waxaa dhacay Jalaskii Iskoolka, waxay Ardeydii iyo Macallimiintiiba u dhaqaaqeen xaggii safka, ardeydiina way safatay.

Maamulaha Dugsigu wuxuu xiray albaabkii weynaa ee Iskoolka, maadaama uu waqtigii dhacay, wuxuuna soo aaday dhinicii Ardeyda, wuxuuna amray in la qaado Hees-[redacted] tii Calanka, ee caadada u ahayd Dugsiyada Dalka, ardeydii markay qaadayn Heestii calanka, dabadeed maamulihii wuxuu u yeeray fasalkii iska lahaa khudbada saaka, fasalkaas oo ahaa fasalka J.

waxaa isla markiiba Ardeyda ka soo dhex baxay Daacad oo gacanta ku wata warqad uu khudbada ku soo diyaarsaday, Daacad warqada kama akhriyeynin khudbadaas, laakiin, wuxuu ka seganayay Qodobada ugu muhiimsan, intuuna khudbadiisaa bilaabin waxaa ardeyda dhexdooda ka baxaayay buuq iyo hadal ay ardeydu ku doodayaan, iskuna lahaayeen, kana muxuu ku hadli doonaa, iyo maxaa ka raaci doona, waayo, waxay ardeydu ogaayeen Jaamac yare oo maalintii Daacad ka horeysay meesha ku ceeboobay, iskuna dardarsamay, wuxuu soo diyaariyana garan waayay cabsi awgeed, waxaana Jaamac maalintaas ka raacday ceeb iyo dacaayad.

Daacad sidey ardeydu filayeyn ma noqonin, dad badan oo liidi jirayna maalintaasay ka harayn, gabdho badan oo xaman jiray inuu yahay maskiin waddad ah oon hadalkaba aqoon, waxay ku jeclaadeen daqiiqado gudohood, waayo, hadaladaa uu soo qaatay ayaa aad u cajiib badnaa, ardeydana aad u khuseynayay.

Daacad markuu khudbadii dhameeyay waxaa u dhacay Sacab la yaab leh, markuu ka soo dagay Daabuurkiina waxaa ku soo yaacay Ardeydii fasalkooda, iyaga oo ku faraxsan sida geysinnimada leh ee uu fikradiisa u cabiray.

Gabdhaha fasalkiodu way wada dhunkadeen, waa xayna ku soo dhawaayeen gacmo furan.

Maamulihii Dugsiga aad iyo aad ayuu ugu farxay khudbadaas ammaanbuuxa ka daba qaatay Ardey Daacad, isagoo ardeyda kalena ka rajeeyay inay khudbado noocaas ah oo ardeyda saameeya soo diyaariyaan, wuxuuna amray in fasalada la galo, si xisaskii maalintaas loo qaato.

Waxay ardeydii kala aadayaan fasaladoodii, iyagoo la yaaban khudbadaa wanaagayda iyo siday runta u taabanayso, ardeyda qaarkood way ka xamaaqsanaayeen khudbadaa Daacad soo jeediyay, waayo, iyaga ayay taabanaysay, waxayna u badnaayeen ardeyda dhaqan xumada caadeysatay.

Fasalka J. oo ah fasalka uu Daacad dhigtowe xisaska ay maalintaa lahaayeen waxaa ka mid ahaa Suugaan, Fiisikis, Kimistari, Xisaab iyo taariikh, Baraha xisada koowaad iska lahaa, Bare Keyd wuxuu galayaa xisadii Suugaanta ahayda ee uu Fasalka J. ku lahaa, Bare Keyd wuxuu ahaa Macallin ay Ardeydu aad u jecesha̲ay sharaxiisa, aadna u yaqaana Suugaanta Soomaalida, wuxuuna ardeyda u soo diyaarin jiray casharo xiise badan oo iyaga quseeya.

Cashirkan casharkii ka horeeyay wuxuu ku saabsanaa Xigmada Suugaanta Soomaalida siima Gabayada iyo Heesaha, wuxuuna tusaale u soo qaatay dhowr Gabay iyo dhowr Heesood oo horey rag hore u tiriyay, qaarkoodna buugaagta Dugsiyada sare lagu qaato, Gabayadaa iyo Heesahaas waxay aad u ammaanayeen hodonsanida dhaqanka Soomaaliyeed, wuxuu Baruhu bar-bardhigayay dhallinyarada hadda siday dhaqankii u badalayn iyo dhallinyaradii hore siday ugu dhaadan jireen, wuxuuna aad u cambaareeyay dhallinyarada ku dhaqma dhaqamada shisheeye, kuwaasoo uu ku tilmaamay kuwo lunsan, waxay aflaanta ka arkaana ku dhaqma, sida Wiilasha Silsilada qoorta ku xidha ama Timaha labada dhinac ka jara, iyo Gabdhaha iyaguna aan cawradooda asturin, soona xidha waxyaaba aan aan cowradoda asturey, sida Dirac qafiif ah oo uu jirkooda oo dhan ka muuqdo, dhar gaagaaban, Surwaal lugaha u dhuuban kuna dhagan oo cawradooda muujinaya, wuxuu kale uu Baruhu sharaxiisa ku soo daray Gabdhaha afka caseesta iyo kuwa Timaha jarta, una'maleeya ilbaxnimo iyo qurux.

Bare Keyd sida caadada u ahaan jirtay wuxuu weydiin jiray ardayda su'aalo si uu u ogaado in ay Casharkii fahmeyn iyo in kale.



BARE KAYD:-"Casharkii kan ka horeeyay waxaa ku jirtay Weedho aynu kasoo qaadanay Gabayo iyo Maahmaahyo, ku saabsanaa Haweenka"

Sidaa darteed su'aashayda Koobaad, waxaan waydiinayaa Daacad;

iyo caasinimo u go'doontay, waxaa kaloo Ardayd fasalka ka mid ahayd Maamaad oo ah gabadh aad u asturan asluubna leh.

Wiilasha fasalka waxaa ka mid ah Daacad, Jamaal iyo wiilal kale oo fara badan. Daacad iyo Jamaal waxaa lagu tiriyaa in ay yihiin wiilal aqlaagad fiican.

Bare Keyd wuxuu billaabayaa in uu ardayda weydiiyo su'aalihii casharkii hore, si uu u hubiyo inay ardaydu fahmeen iyo in kale, waxaana su'aalihiisii ka mid ahaa:

BARIHII:- Daacad, waxaad sharaxdaa xigmada ka dambeysa weerahan "Dhulka jiifto lama guursado iyo dhererka qaarkiise, Madday dhuubo wayd tahayna waa raaxo kaa dhimane".

DAACAD:- Macallin waxaa looga jeedaa xigmadan, oo lala hadlayaa ninkii raba inuu gabar guursado sidii uu u xulan lahaa iyo gabdhaha guurka ku haboon siday u eg yihiin ayay xigmadani inoo sawiraysaa.

BARIHII:- Waa jawaab sax ah, Hagar la' adna waxaad sheegtaa micnaha looga dan leeyahay, murtida ah " Dasar seexato iyo Girkeed bogoto"

# TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa soo baxaya Dugsi Sade dex Dabaq ah oo leh deyr weyn, waxaa iyaguna muuqanaya fasalada uu dugsigu ka kooban yahay, min kor ilaa hoos, waxaa ka dhex muuqanaya ardaydii dugsiga iyo Macallimiintoodii, waxaa si gaar ah u muuqanaya Fasalka J. oo ay ku jiraan ardeyda fasalka iyo Macallinkoodii.

Ardayda fasalka waxay sitaan dharkii caadada u ahaa Dugsiyada sare, waxaana arda kasta u dheer buugaagtiisii iyo boorsadii uu ku sitay, macallinka fasalka ku jiray oo ah macallinka Suugaanta wuxuu labisnaa dhar caadi ah, iyo muraayadaha indhaha.

Hawadu way daganayd cirkana waxaa saarnaa ceryaamo aan roob lahayn oo qoraxda kuleylkeeda hagcogtay, neecow qaboow ayaa dhaceysay maalintaas, qeylada fasaladuna aad bay u yareyd wax buuq ahna lama maqlayn, waayo, ardayda ayaa xisado kuwada jirtay.

Ardayda fasalka J. waxaa ka mid ahayd, Dayaca oo ahayd ardayad aad iyo aad u qurux badan asluub iyo xishoodna ku darsatay, waxaa kaloo fasalka ka mid ahayd Hagar la' oo ahayd ardayad dhagan badal

HAGARLA':- Maxaan ka aqaan aniga waxaas, maxaase ka mïona ah haddii casarkii gabdhuhu iska seexdaan.

BARIHII:- Miyaadan joogin maalintaan casharkaa sharxayay, mise Buugaagta meeshaad ku tuurtaba kama qaadid.

HAGARLA':- Maxaa Buugaagtayd kaag(a)shaqa ah adiga?

BARIHII:- Aad baad u aqlaaqad xun tahay, si asluub leh horta u fariiso, si xushmad lehna iila hadal, baritana adoo waalidkaa wada ii imow.

HAGARLA':- Haddaaba fasalka kaaga baxayaa, waxbarashaba ma anigaa raba, maxaa iiug qa-ylqaylin.

BARIHII:- Ka bax fasalka adoo kale waxaad ka mid tahay kuwa lagu qasaaree.

Hadaladaas ka bacdi Hagarla' fasalkii way ka baxday iyadoo indho xun ku fiirinaysa macallinkeeda, si xuna isku qalqalcocinaysa, Barihii isagoo ka xun falka ardaynimada ka baxsan ee ay sameysay Hagarlä' ayaa waxaa maskaxdiisa ku soo dhacay Gee-raarkan: " Ayaan daranaa kinkii ardayeen
Aqoonin ujeedadiisaba
[illegible] nimaas nickii ardayeen
[illegible] -9-

Aqoontii la baray aan garanayn
Walee ardaynimadu waa dahab
Aqoona ninkeedii baa iska leh
Ilaaqna ninkii badshaa garan
Abuurna Illaahay baa iska leh
Aduunkana isagaa maamula

Barihii intuu madaxa ruxay kana faa'iidaystay waayeargnimadiisa macallinimo ayuu ardeydii waaniyay, ugana digay sida ay Hagarla' ku dhaqaaqday oo kale, intaa ka bacdina waxaa dhamaatay xisadii koowaad, waxaana dhawaaqay Jalaskii Xisada labaad, barihiina wuxuu u galay fasal kale oo uu ku lahaa.

Hagarla' markii ay ka soo baxday fasalka toos ugama aynan bixin iskoolka ee waxay fariisatay barxada dabaqa sare, halkaasoo ay isku hagaajinaysay iyada oo rabtay inay iskoolka ka baxdo, siina marto guryo saaxiibadeed ay dagan yihiin, waayo ma aynan rabin in ay gurigooda aado, sababtoo ah waxay ka cabsanaysay in la weydiiyo sababta xiligan soo celisay. Hagarla' waxbarashada ma aynan rabin waxayna ula booca ah ugu kutubaysay siday waxbarshada uga hari lahayd, uguna biiri lahayd qoomka caa-

si waalidiinta loo yaqaan, maadaama oo ay waayahaanba aad u tixgelin jirtay arrimahaas.

Nasiib wanaag waxay la kulmaysaa markay iridka iskoolka ka soo baxdaba Wiil caas⁴ ah, oo raadinaayay qof ay waqtiga isla lumiyaan, ama Gabar uu lug gooyo, waxaan wiilkaa la oran jiray Dage.

Dage daqiiqado ka hor ayuu baranka iskoolka yimid, wuxuuna watay Baabuur cad oo uu Gabdhaha ku siro, waligii iskoolada horteeda ; gama waayo isaga iyo qaar saaxibadiiba ahba, waxayna ilaashadaan gabdhaha iskoolka ka soo daahay i.t kuwa laga soo eryo iskoolka,si ay u lug gooyaan, tiro ma laha inta ay gabar yar qiyaameeyeen suuq v In- eegna ka dhigayn.

Dage markii uu arkay gabar ka soo baxaysa albaabka iskoolka aad iyo aad ayuu u farxay, wuxuuna aad u sii farxay markuu ku arkay astaamihii caasinimada oo Hagarla' aad uga muuqday, waayo, dharka ay sidatay, iyo muuqaalkeedaba waxay shaayeen midx ayna ishu qaban karin, dadka fiicanina ay ka cuudi bilaystaan.

Dage iyo Hagarla' sheekadii dhex martayna

NEDA

waxaa ka mid ahaa:

DAGE:- Ooh, Oof Caleg waa tanaa taa sugayay, tan camal waaye, Eey, yarta yarta Abaayo kaalay su'aal baan ku waydiinayaa.

HAGARLA': Haye maxaad rabtaa, aniga maad ii waceysaa?

DAGE:- Yaan kaloon u wici lahaa, waaba xanaaqsan tahee maxaa dhacay?, bal horta Baabuurka soo gal aan ku sii dhaweeyee.

HAGARLA': Walaahi waa igu Macsan tahay, ku oo dhoore ah ayaa iga soo xangajiyay, oo Macallin ah, ana waxaa rabay wax mar un iskoolka iga soo saara, dhibkiisa iyo shidadiisa yaaba i dhibay, wax laga faa'iidayana ma leh.

D Dage intuu ka faa'iidaystay jiljileyca ka muuqday Hagarla', iyo ogolaansho dhawida ay Baabuurkiisa soo gashay, ayuu Sheeralaha boobsiiyay baabuurkii asaga oo Hagarla'na sheeko halaasi ah iyo Cajalad Mareykan ah intuu u saaray sidii laba Qof oo waligoodba is yaqaanay sheekadu isugu duba dhacday, waxaana hadaladuu ku beer laxawsaday ka mid ahaa.

DAGE:- Maxaa iskool laga helaa, aniguba beri horaan isaga baxaye, lakiin Adiga maxaa iskool iyo shiddadiisaba ku baday, gabadh jir ah aqoonadba tahaye, saaxiib ma qabtid miyaa?, iyo tuu hadalkaas iyo gacantisa mi- ... , ayuu Bayaca Hagarla Xaluska ... ay, isagoo go... iyo ilka cadayn isku daraya, ujeeda- ... suna tahay bal in ay ogolaahay faraha ragga iyo ... in kale, si uu u ogaado in ujeedooyinkiisu u hir gal ayaan iyo in kale, waxaana u cadaatay inuu ka h layo hagarla ... i alliyo sida uu doono, maadaama ay ka ga jawaabtay, farihiisii oglaasho iyo qosol aan xanaaq lahayn, waxayna ku jawaabtay.

HAGARLA:- Abboowe ku co ... yaala suuq ah, ila markaana aan ilbax ahayn ayaan saaxiib la ahaan jiray, haddana waan kala harnay.

BAGE:- Ooh! waan ka xumahay, Adiga Xamal leen wal igay raadinayay, labada isku habbooni wal igoo isma helaan, hadda maxaad ka qabtaa haddii aan anagu saaxiibno?.

HAGARLA:- Waxba kama qabo.

BAGE: Aad baad u mahadsan tahay haddana gurigay ... gaan isku raac ... ynaa. ... anaa ku

sii gayn doona hadhow, maxaad ka qabtaa arrintaa.

HAGARLA:- Waxba kama qabo, in aan gurigaaga soo ~~b~~ beeto ayaanba rabaa.

Heshiiskaa ka baodi way is raacayaan waxana la aadayaa gurigii Dage, halkaasoo sheeko xiisa leh ay ku dhex martay Hagarla iyo Dage; waxayna ku heshiiyeen in ay saaxiibo, aynan waxba u kala soocnayn ahaadaan, wuxuuna ku guubaabiyay Hagarla in ay iskoolka iska dayso, iyana way ka aqbashay waxayna u go'doomeen Caasinimo iyo Baar tegid, taasoo Hagarla u keentay in reerkoodii ogaado, Xaafaddana laga eryo, waxaase in muddo ah hayay Dage, inkastoo uu markii dambe iska eryay, iyana waxay horay u sii gashay Suuqeeda, halkaasayna isku seegeen waxbarashadeedii iyo sharafteediiba.

Ardaydii ay isku fasalka ahaan jireen iyo kuwii ay isku iskoolka ahaayeenba waxay halkii ka sii wateen waxbarashadoodii, waxaana maalintaa isqolka ka taagnayd dood uu kiciyay Daacad oo subaxdaas khudbad ka jeediyay Dugsiga.

Ardaydu waxay isugu jireen kuwa ku raacsan Daacad iyo kuwa ka soo horjeeda.

## ARAGGA LABAAD

## KULANKII DAYACA IYO JAMAAD

Waxaa maskaxdeeda mashquuliyay wax aanay ge-anayn, waxay is aragtay iyado oo kalgacayl hayo, waxay dareentay in ay wax jeceshahay, waxayse garan la'ayd siday u muujin lahayd rabitaankeeda, wel wel iyo walaac yaa la soo fatahay Gabadhii Dayaca ahayd, waxaana maskaxdeeda si miyir la'aan ah ugu soo dhacayay erayadan:-"Ma wiilbaan oran karaa wa an ku jeclahay, maya! Maya! waa ceeb! Oo haddaan iraahdo maxaa ku jaban?! allaylehe waxba!, oo hadduu i diido soo sharaf jab iyo ceebi iiga iman mayso, miyaan khayrkayga iska celin karaa?, haddu jabkaasi i gaaro, waa maya. Allaylehe af-daboolan waa dahab, horaana loo yiri" Hadal wuxuu ammaan yahay, inta aadan oranine

afka hadduu ka soo baxo

arkaa qaadba weeyoc

ummadduu u dhexeeyaa".

Alleylehe waa dhab si kaloon ugu sheegaba kelmadda waan ku jeclahay marna afkayga kaga maqli maayo, sow lagama yaabo Daacad saan u jec-

lahay in uu isna ii jecelyahay, wallaahi waa suurta gal, mindhee indhihiisaan ka gartaaye; waayo waqti kasta wuxuu jecelyahay inuu wax i baro, imtixaano badana isaga la'aantii waanba dhici lahaa, illaa heer uu waxqadiisa imtixaanka ii beddelo uu gaaray, naf huridda intaas la eg waxbaa ku jira, malaha wuxuu ka baqayaa in aan ku naco wax la'aan ta, ma nin la nici karaa? wuu baxxiyay shuruudihi rag lahaa waana nin laysku hallayn karo. Allaylehe wax kastaba ha ka dhacaanee aan u sheegto jacaylk ayga, maya! maya!" intaadan falin ka fkirso" waa xikmad aan la dhaafi karin, horta saaxiibadday aan la tashado waa intaasoo fikrad cusub ay igu soo kordhisaaye.

## TILMAANTA ARAGGA

Haahaa la furayaa, waxaa muuqanaya laba gab dhood oo ka mid ah Ardayda ku sheekaysanaysay bar xadda dabaqa sare ee iskoolka, waana Dayaca iyo Jamaad, waxaana dhex maraysa sheekadan, oo ay Dayaca rabtay inay saaxiibaddeed talo fiican ka siiso arrinta haysata, inkastoo ay Dayaca ka cab si qabtay, in Jammaadna ay sideedoo kale jecesha yahay Daacad, waxaysa go'aansanaysaa in ay u shee gto arrintan, [illegible] [illegible]

DAYACA:- "Saaxiibay i dhegayso
mid yarbaa i dhibaaya
oon dhabankiisa jeclaaday
wadnahayga dhexdiisa
dhinac buu caashaq dhameeyay
ee arrintaa i dhibaysa
saaxiib maad ila dhamaysid"

JAMAAD:- Saaxiibay hadalkaaga dhegaystay
oo arrintaadu dhab weeye
ee wiilkan aad la dhacdee
naftaadii dhibayaa
ku dhawaaq magaciisa.

DAYACA:- Saaxiibay waxba kaa qarin maayee, horta Fasalkeenna wax ma ka jeceshahay? illaya horaa loo yiri„hubsiino halbaa la siistaaye".

JAMAAD:- Illaa hadda wax aan xiriir la [illegible]eyahay Fasalkeenna kuma jiraan, inkastoo ay jiran wiilal u qalma in la jeclaado, sida Daacad iyo Jamaal oo kale.

DAYACA:- oo yara naxday qosolna u muujisay saaxiiba deed, ayaa tiri"Abbaayo Daacadbaan aad u Jeclehee ka warran" si aan [illegible] sheegana waan garan la'ahay, Bal [illegible] tali, maxaan [illegible]?

JAMAAD:- Alla tani miskiinsanaa, naa nin aad jeceshahay Myaa laga xishoodaa, hadduu kaa diidana ma nin kalaad waayaysaa, quruxdaa buu Ilaahay ku siiyaye, waxaanse kugula dar-daarmayaa arrin aad ugu fiican gabdhaha, oo raggu inta badan ku baabi'yo, waayo gabadhaan iska adkayn raggu wuu ku ciyaaraa, hadaba waanadaydan qaado oo w wax yar i dhegayso.

"Gabadh naasku foodiyo
ka fooraro fadhiga guud
waa foolxumiyo ceeb
waa mid aan fayoobayn
ilbaxnimo fac wayn iyo
waxa faan ay moodaan
caku faraha fiiq-fiiq
raggoo dumar far saaraa
ficilkaasi keenee
foojignaan ogsoonoow
raggu ficil xumaantii
faraha yuuna kula gelin
ragga kiisa faanee
ka fogaada garashada

Waa hamid aanan fiinnayn
ee ka fogoow sidiisaba
Gabadh fiionideeduna
waa intay fayoowdahay
fudayd iyo xishood li'i
gabdhaha umaba fiicnee
foojignaan ogsoownoow

DAYACA:- Abbaaya ma waxaad ka wadaa, Daacad baa ku dhaqmaya sidaas?.

JAMAAD:- Maya ee Daacad ugama cabsi qabo arrimahaas ama in uu kugu ciyaaro, laakin ragga hadda faraha ayay ka falan yihiin, afkana kamaba sheekayn yaqaanaan mar hadduu xaalku fara fiiq-fiiq gaadhana, talo fara ka haaday, sidaa darteed gabadhaan ragga farihiisa iska celinin iskana adkayn, saan kor ku soo sheegnay yaa qabsanaysa.

DAYACA:- Abbaayo waa talo fiican, haddaana Daagad raadinayaa una sheegayaa arrintayda ee buugaagta ii qabo.

Dayici waxay u dhaqaaqaysaa Daacad xaggiisii waxayna rabtaa in ay u sheegto arrinta

la soo gudboonaatay, Daacad wuxuu la taagnaa wiilal iyo gabdho dhigta Dugsiga waxayna ka doodayeen khudbadiisii saakay oo miran badan dhalisay, Dayaca markay aragtay in dood dheeri u socoto Daacad, ayay waxay ku sugaysay meel agtooda ah, si markuu ka soo dhaqaaqo ay ugu yeedho, Daacad iyo dhallinyaradii doodii dhex maraysana waxaa ka mid ahaayd.

DAACAD:- Hadda ma waxaad igula doodaysaan caas inimada iyo dhaqan xumadu inay ka soo bilaabmaan guryaha, gabdhuhuna ku bad an yihiin.

BILAN:- Waxaad Daacadoow ku qaldantay, eedoo dhanbaad gabdhaha gurada ka saartay waxaadna meel uga dhacday guryaha waa lidiinta jooga, ee gabdhaha u ogolaada inay si xor ah u lebbistaan.

HAWEYA:- Daacadoow miyaadan ogayn in raggu dha qan xumada aad sheegtay, isagu gabdha ha baray.

DAACAD:- Naa Gabadh Hooyadeed iyo
Aabbeheed gadaafada
ay ugu garaabaan
gasariirta ceebtiyo

Gefka cidi ka celinayn
gurigooda kala iman
Magaalada la soo gali
Raggoy garabka saartiyo
Suuqa gaaf wareegtadan
bal maxay gayaan iyo
guur ugu hawootaa?."

BILAN:- "Gabdhaha ceebta lagu godi
gefku ma aha kaligood
Gedaafada raggaa wada
gabdhahana aan daynayn
ninka gabadh gayaankiis
gaabsi inuu ka raadshiyo
goconaayo tumashuun
bal muxuu gayaan iyo
guur ugu hawoodaa."

JAMAAL:- Naa waxa adduunka kharibay waa dumarkee waxba kiiska ha iska waalina.

HAWEYA:-"Naa inaga keen kuwani waa reer baadiyayaa le, ilbaxnimadi bay badawnimo u haystaana, waxayna ka soo hor jeedaan gabdhaha qurux doda soo bandhigaya, iyo lebbiskan casri ga ah.

Doodaa ka bacdi ardaydii meeshaa ayay ku kala tagayaan iyagoo isku afgaran waayay kaftankii iyo sheekadii, waxaa isla markaaba isagoon meeshaa ka dhaqaaqin Daacad soo gaaraysa Dayaca, oo rabtay Daacad, waxayna leedahay erayadan.

DAYACA:- Daacadoow adaan ku rabaaye bal ina keen aan faqnee.

DAACAD:- Adna ma doodbaad la socotaa, waan daalay saan Ardaydii u qancinayee.

DAYACA:- Mayee anigu arrin kalaan la socdaa.

DAACAD:- Ma wax dhabaata ah baa jirta, misa waxad rabtaa in aan xisaabtii Layliga ahayd ka shaqayno.

DAYACA:- Xisaabtaa iyo arrimahaas wax kaloo ka daran baan kuu hayaa.

DAACAD:- Waa yehee bal soo dea.

Dayaca way ka xishoonaysaa inay hadalkii ku dhiirato, waxayna indheheedu daawanayaa, kuna dhay gagayaan badwaynta Hindiya, iyo quruxda Magaalada Muqdisho, oo ay ka daawanayeen Dabaqa Saddexaad ee Dugsiga Korkiisa, markay in muddo ah aamusnayd wax hadal shina ~~wax-hadal-shina~~ ka soo bixi waayay xishood awgiis, ayauu Daacad waydiinayaa sabata

ay ugu yeedhay, inkastoo uu iska fahmay Daacad in Dayaca lahayo, hadana wuxuu iska dhigayay waxaanan fahmin, oo iyada ayuu rabay in uu hadalku ka soo baxo; wuxuuna su'aalay in wax dhibaati ihi ku dhac day iyo in kale.

DAACAD:- Dayacaay, maxaa kugu dhacay ood la fikira ysaa, wax dhibaataa miyaa nagu soo kordhay

DAYACA:- Ujeedada aan leeyahay
hadaan ararta kuu sheego
arrimaha la yaabka leh
haddaan kuu ag maro maanta
Caashaq lama illaawaan
haddaan hadal ku soo oogo
agtaaday naftaydii beryahan
ku ambanaysaaye
afkuun bayga xadayee
inaan ar..usaa roonee

Dayaca markay dhamaysay geeraarkaas iyadoo qosol ilka cadaynaysa, dayma xishood ku jirana ku fiirinaysa, ayay waxay leedahay.

DAYACA:- In aad i fahantay ayaan u malaynayaa.

DAACAD:- Aad baan u fahmay arrintaada laakiin waxaan jeclahay in aan kuu sheego arrimo badanoo jira.

DAYACA:- Waahagaag ee hadda xiisadibiibaa la gal ayaaye, waxaan si fiican u sheekaysanay naa galabta, waxaana tegaynaa gurigayaga ee halkeen kuugu imaadaa galàbta?.

DAACAD:- Waxaan kugu sugayaa jerdiina iskoolkeena u dhow ilaa shanta iyo badhka galabnimo

## ARAGGA SADDEXAAD

## KULANKII DHALLINYARADA

Dhallintu rag iyo dumar ceebta uma wada sina sidaa kale wanaagana uma wada sinna, laakiin magaca way wadaagaan, labadan qaybood ee rag iyo dumar, waxaa ka dhexeeya loolan iyo eedayn joogta ah oo midba midka kale u soo jeediyo.

Raggii waxay ku doodayaan Gabdhihiibaa dhaq ankii ka tegay, ma gabadh hadda la guursado ayaa jirta, Gabadhaad aragtaaba tii kale ka daran, waxaanad moodaa in hal macallin wada babarbaray, gabdhaha haddu waxay ragga u fududeeyaan gaabsiga, wuxuuna raggu isku qanciyaa in gabdhihii oo dhan ay noocaa yihiin, waxayna rag badani caadaysteen inay gabdhaha dacaayad ka fidiyaan mid kastana ay ku tilmaamaan naagtumata, iyagoo isku qancinaya

in dumarkaa dhaqan guur ku dhacay xishoodkiina ay ka tageen, waxay iloowsan yihiin, in gabdhaha Soomaaliyeed ayna dhaliishaa u wada sinayn, laga na helayo kumaankum gabdhood oo sharaf leh ceeb iyo fadeexadna ka madax banaan, diyaarna u ah in ay helaan wiil u qalma oo ay nolosha la qaybsad aan, laakiin horaa loo yiri"baruur quruntay ayaa baruuryo qudhmisa" Gabdhaha magacoodiina waxaa dilay duul tiro yar oo sumcadoodii ku ciyaaray caadaystayna tumashada iyo dhaqan xumada.

Gabdhihii sidoo kale waxay iyaguna ku dooda yaan ragga maanta ma ragbaa, ma rag laygu aamini karo ayaa jira, dhammaantood waa wada danaystayaal doonaya in ay gabdhaha gaabsi ka helaan, iyagoo shuruud uga dhiga, dhaqan iyo caadana ka dhigtay in ay gabadha marka hore gaabsi ka helaan kadibna guursan doonaan, laakiin arrintaasi waxay noqot ay khiyaamo raggu gabdhaha mustaqbalkooda k ha lleeyo, gabadhay arrintaas ka helaanna meel cadla ah ayay kaga dhaqaaqaan, waxayna ku diraan bulsh ada inteeda kale, iyo gayaankeed, waxayna gidaar ada la wada fadhiyaan gabadh caay iyo ceeb u yee lid ninkii guur doon shaayoo dhan waalwal ku abuu rtay.

## TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa muuqanaya jerdiin wayn oo ay dhallinyaradu fariistaan, waxaa ku dhow jerdiinka laami baabuurtu maraan; jerdiinku wuxuu leeyahay kuraas dhagax ah oo lagu fariisto waxaana inta badan fariista dhallinyarada sheek ooyinka gaarka ah leh, waqtigu waa casar gaaban qorraxduna gaabatay, abbaaraha saacadduna kow iyo tobankii galabnimo, waxaa jerdiinka dhex fadhiya dhallinyaro badan oo wiilal ah, iyo gabdho aan saa u sii badnayn oo wiilal la fadhiya, dhallinyarada qaarkood meesha ballan ayay ku lahaayeen qaarka kalana sheeko ayay isaga yimaadeen, waxaa si gaa r ah u muuqanaya Dage iyo Hagarla oo kulankoodii labaad meeshaa ballan ku lahaa. Dage wuxuu rabay in uu saaxiibadii baro Hagarla, waxayna saaxiiba dii inta badan soo fariisan jireen jerdiinkaas Dage iyo Hagarla oo sheeko fiicani u socoto ayaa dhallin yaro badan oo Dage saaxiibadii ahi si is dabajoog ah jerdiinka u soo galayaan, waxaa ka m mid ahaa dhallinyartaas Dhaqane, [redacted], Mahad, Bilan iyo Haweeya, dhallinyaradani waxay dhallinyaradani waxay isugu jireen kuwa horay

isku yaqaanay iyo kuwa hadda lays baray, waxaa ku jiray dhallinyarta qaarkood kuwa caasiwaalidiin ah iyo kuwa ka soo horjeeda, doodii dhex martayna wax aa ka mid ahaa. "

DAGE:- Saaxiibayaal maxaad sheegteen mase la soc otaan caawa iyo cawayska Jasiira?.

HAWEEYA:-Kooxdeebaa ka tumaysa?.

HAGARLA:-Alla miskiinsanaa kuwani, aad baad uga dambaysaan dhallin yarqda, oo miyaydaan la soconin Iftin iyo Jasiira caawa?.

DHAQANE:-Waar intaan caawa iska dayno cawaysyada qarashkooda maan iska galno ruwaayadda cusub ee golaha murtida ka socota?.

BILAN:- "Alla kani reer baadiyaysanaa, waar miyaa dan ogayn in laga ilbaxay ruwaayad,gabay iyo heesa Soomaali, Almiino maad filim Hindiya tirashid.

MAHAD:- "Naa waadigan leh waa laga ilbaxay Soomaaligaye maxaa waxaa ku wadaya Af shisheeye iyo dhaqan shisheeye?".

DHAANRAAC:"Bal horta suga dhammaantiin waad qaldan tihiine, soo lama socotaan in lagu jiro xili casri ah, loona baahan yahay in la sameeyo horumar, maxaa dib noogu celinaysaan?".

HAGARLA':- "Allaa ya cisag kanaa ugu ilbaxsan, waqtigana la sooda".

MAHAD:- "Naa intaan maan wax doorshiyo
Macmacaan ku noolahay
Micnaha ma laha noloshuba
Haddaan sidan ku moodnee
Intaan Moodku ina helin
Muuqeenu wacan yahay
Miliosiga iyo ciyaaraha
Micno inooma tarayee
Male kale ma heysaa"

HAGARLA':- "Adduunyadu lur weeyoo
Layskuma haleeyee
Hala yaabin saaxiib
Lagdan weeye Dunidiyoo
Waqtigaa lalmanayoo
Nasiibkaa ladnaasho leh
Naxariista Eebbaa
Nin kastaba u furanoo
Waxaad naawilaysaa
Eebbe hagaanaruurtaa
Ee nafta aan u raaxaynee
Adduunyada lurkeediyo
Nagga daa la yaabyada".

DHAANRAAC:-
[redacted]:-

"Alla [illegible]oomanaa Kani waxa dhacaya maba
Wax dhacaya maba oga
Waar dhibaatada adduunyadu
Waa waxaan dhammaanayn
Dhici doona oo jira
Ee dheesha iyo ciyaaraha
ha inaga dhantaalina".

DHAQANE:- "Dhabahaan ku suganahay.
Dhimashaaba dhaantee
Dhulka miyaan ka guuraa
Dhaaya ma laha ruuxiix
Dhaqankiisa bi'iyee
Soo kan dhaqankii naga lumay
Soo kan dhalasog nagu dhacay
Dhallaanka soo koraayaa
Yay dhowran doonaa
Dhaxalkoodii bi'inaye
Dhaqan xaggee ka helayaan
Dhibaatadan bilowga ah
Haddaad dhiiri galisaan
Dhaqan kalena raacdaan
Dhunkaal iyo sun weeyee
Dhaxal kale ha suganina".

Doodaa ka baadi dhallinyaradii way kala qaybsamayaan waxayna kala baxayaan laba qeybood, qeyb caasinimadii sii wadata iyo qeyb ka soo horjeeda, halkaas/ku kala tagayaan iyagoo kala xanaaqsan, daqiiqado ka baadi waxaa meeshaa imanaya Jamaal, inkastuuna ku soo gaarin dhallinyarada meeshaas haddana Jamaal wuxuu ka mid yahay dhallinyarada dhowrsan.

Jamaal wuxuu in muddo ahba raadinayay Gabar uu guursado, wuxuuna ka mid ahaa dhallinyarada Guurkii ka shikiday, Jamaal inta badan Gabdhaha wuxuu ku nici jiray dhaliilo yar yar ah, sida Labiska timaha la jarayo, Dirica qafiifka ah, Af caseesashada, suuq wareega badan, xishood la'aanta AI.W.M.

Jamaal waxay arrintaas u keyntay guur la'aan iyo imuu muddo dheer ay ku qaadato xulashada Gabadhii nolosha la qeybsan lahayd, wuxuuse ugu dambaystii xushay Gabadh aad iyo aad u asturan una qalanta in la jeclaado, inkasta oo uu Jamaal ka baqayay inay gabadhaas la fahmi waydo u[illegible] kiisa guur, wuxuu hadan go'aansaday imuu jacaylkiisa u [illegible]ago, meel kasta oo ay joogtana ka raadiyo.

[illegible] Jamaal ka cabanaya guur la'aan [illegible]
[illegible] kantada [illegible]

JAMAAL:- "Wax kastaba la yaab leh

Hablaha taan jeclaadee
Nafta aan u hibeeyee
Ku haboon arooskaba
Meel bay ka hagan tahay
Hawraar jacaylkay
Waxuun baa halaagee
Ma waqtigaan haboonayn
Ma anigaa hanwaynoo
Hiigsanaaya meel kale?".

Walee waa yaab?! cajiib! cajiib!, Gabadhan guurso is iraahdaba iin un baa lagu sheegayaa ama dhaliil uun bay yeelanaysaa, hadda waa inaan gabadhan Jamaad ah Jacayl rasmi ah u [illegible]isaa iyadaa ugu roon intaan gabdho arkayay, waa inaan caawa raadiyaa in kastoo aanan gurigooda aqoon, haddana wax ii sheega waayi maayo, ama iskoolka ayaan ha-ri ugu sheegi, waayo gabdhihii fiicnaa waa la dhameystay waxaana soo haray hal-hal xabbo oo aan gurigooda ka soo bixin, haddey Jamaad i dhaaftana way ii dhammaatay, sidaa darteed waa inaan raadiyaa. Isagoo sidaa [illegible] u dlays Jamaal, ayaa na-

siib wanaag waxaa meeshaa soo maraysa Jamaad oo ay ay xaafadooda halkaa ka dhawayd, alaabna rabtay inay suuqa ka soo gado.

Jamaal markuu arkay aad ayuu ugu farxayaa wuxuuna isku diyaarinayaa sidii uu caawa ugu sheegi lahaa inuu jecel yahay, waxaana hadaladiisii ka mid ahaa;

JAMAAL:- "Alla maxaa iga nasiib badan caawa, adigaan halkan kuu taaghaa Jamaaday, hadda ayaan rabay in aan guriga iina soo raadiyo.

JAMAAD:- "Horta maad i salaantid? dabadeedna ii sheegtid waxa aad iga rabtid?

JAMAAL:- "Salaantaaba waa la iiga daran yahay oo aadbaa la ii hayaa salaana ninkii ladan ayaa wax salaama, ee maxaad og tahay?".

JAMAAD:- Allaahu Akbar, war inaga dhaaf kaftanka iyo ciyaartoo Imtixaanadii goormaa la qaadayaa?".

JAMAAL:- " Imtixaanba aadaa hadal haya anigana adigaaba imtixaan igu noqday, waxaan akhri iraahdaba iyo buugaan qaadaba adigaa ka muuqana ee maxaan imtixaan diyaariyaa".

JAMAAD:- Alla bisinka iyo yaasiinka oo ma sidaasaa bastaa u tahay?.

JAMAAL:- Ninbaa waxuu yiri"Cadduur dhawdhaawdu uma dhagdhacsana" weli adiga ciyaar ciyaar bay kula tahay, aniguna adigaanba kuu dhimana Maa, waana ku jeclahay."

JAMAAD:-"Oo hadda ma kaa dhab baa? Araybaa nahee maynu waqtigeenna sugno, oo aan waxbarash ada dhamaysano, anigu waxba kama qabo had daan isla soconayno, haddase diyaar uma ihi guur.

JAMAAL:- Aniguba hadda ma rabo inaan waxbarashad eenna isaga ciyaarro, waxaanse rabaa in aan mustaqbalka wada noolaano, bal haddana waxyyar i dhegayso, aan jacaylkayga ku tu tusee"Gabadh yahay guduudane

Xamar goonya joogta.
Geenya yahay aan jara baran
haddana gaaf wareegtaa
guduudkaagan dhiinka ah
gabbashadan xishoodka leh
gocashadan kalgacalka leh
ee Adiga kugu go'an
guur doon in aad tahay
garaadkay i siiyee
mays guursanaynaa."

JAMAAD:-"Waa gedaad u sheegtaye
Geesiyahow asluubtiyo
dhaqankii an garab marin
ragga kaan is garatee
caashaq igu gardaadshee
guur sharaf leh ila raba
gayaankay hadduu yahay
gogol baan u dhigayaa
Adiguna geddoo kale
guur doon hadaad tahay
geeraaradaadiyo
codsigaagan gaar ah
gabadh oofin baan ahay.

Jamaal geeraaradaas ka bacdi wuxuu ogaanayaa in ay jamaad jeceshahay guurna diyaar u tahay, saa darteed, farxad ayuu heestan qaadayaa.

(HEES)


JAMAAL:- Cadrad yahay qurxoonee
Calmadeen ragoo idil
Camba soo baxaad tahay
Cadaw ina ragoo idil
Canid ula diyaar yahay
Caashaq aan qiyaasnayn
Ragbaa kuggu calmanayee

Codsiyadan raggee badan
Aarmaad la ciirtaa
Caashaqeenna lumisaa"

**** ***

"Qanabeey Walaalay
Caashaqani an kuu qabay
Calooshaan ku haystaa
Cudur daarku wuxuu yahay
Caashaq qariska igu dilay
Casaankaagan dhiinka ah
rag baa kugu calmanayee
haddii aan ku caashaqay
Aar maad igu ciyaartaa
Caashaqeenna lumisaa".

Heestaa ka bacdi waxay Jamaadog-anaysaa in Jamaal ka baqaayo in ay ku wacad furta ama ay rag kale la haysato, waxay u caddaynaysaa in ay jacayl ka adkayn doonto, iyadoo ka codsanaysa in unaka ma sayrin haddii uu ku arko rag kale iyada oo la soco ta, waayo Jamaad waxay ahayd gabadh sad iyo aad u bulsho ah, waxayna inta badan iskala sheekaysan jirtay wiilasha Dugsiga badankooda, wiilashuna way ku wareerijireen sirta Jamaad, maan ay xidhiidh gaar ah is la lahaydna ma jirin, dhammaantoodna afkay kala [illegible] socotay, saa darteed ayay u cadaysay Jamaal



in aysan jirin cid ay xidhiidh gaar ahaaneed la leedahay, waxayna ka codsatay in aan sirtooda la ogaan.

Jamaad waxay ahayd gabadh isku kalsoon isla markaana aan waqtigan guur diyaar u ahayn, waxayse ceebteedu ahayd, wiilasha runta uma aysan sheegi jirin wiilkii la sheekaystaba, ama mustaqbal ku soo hadal qaadana kama ay diidi jirin, waxaa kaloo ay samayn jirtay wiilasha ma aysan gayn jirin guri gooda, magaalada uma ay raaci jirin, waxays ku qa arijin jirtay af-been ah, Jamaalse sideebay ula dhaqmi doontaa.!?

Jamaal ma ahayn nin la dhayalsan karo wuxuuna ugu asluub iyo aqoon fiicnaa ardayda dugsigooda, Jamaadoo ay isku fasal ahaayeenna aqoon dheeraad ah ayay u leedahay raganimadiisa iyo shakhsiyadiisa sidaas darteed iyada laftigeedu hoosta ayay ka jeclayd waxayna filaysay in uu mar uun la hadlo.

Habeenkaas farxad iyo rayn rayn ayay sheeka doodi ku dhamaysteen, waxayna isla garteen in ayna cidi ogaanin jacaylkooda.

## ARAGGA-AFRAAD

## KULANKII LABAAD EE

## DAACAD IYO DAYACA

Daayaca intayna imanin meeshii lagu ballamay waxaa ka soo hor maraya Daacad waayo wuxuu xalinaye ay maskaxdiisana mashquuliyay arrintii cusbayd ee Dayici ula timid, wuxuuna is . hor keenay arrimo badan oo isaga u gaar ah maadaama uuna lahayn, hanti iyo awood uu ku qaabàli karo gabar uu guursado, wuxuuna la yaabanaa sababta ku kaliftay inay Dayaci jeclaato maadaama oo ay tahay gabadh reer ladan ka dhalatay, isagana la soocota xaaladiisa, waqtiyo hore ayuu Daacad ku hamiyay inuu jeclaado Dayaca laakiin wuxuu ka baqay inay ku diido faqrinnimada, sidaa darteed marna qalbigiisa ma raacin jirin laakiin aad buu u jeclaa, wuxuuna hadda go'aansaday inuu la wado mar haddii jacaylkii ayadu qabtay waayo, Dayaca wixii Illaahay u dhaliyay Qurux iyo qawi, waxayna ku darsatay asluub iyo xishood, go'aankaasi markuu gaaray, isaga iyo maskaxdiisuna in muddo ah murmaye een, ayaa waxaa imanaysa Dayaca oo Baabuurkoodii iskoolka lagu keeni jiray wadata, inkasta oo ay soo daahday haddana Daacad waxba kama qabin, wayna uga cudurdaaranaysaa soo daahideeda.

# TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa muuqanaysa meel bar-xad ah oo Jardiin lagu naste leh, una dhaw jidka Baabuurtu maraan. Jardiinka gidaarkiisa waxaa ku fadhiya Daacadoo habeenkaas ballan la lahaa Dayaca Daacad wuxuu labisnaa Dhar caadi ah oo aan dhaaf-siisnayn dharkii uu horey u xiran jiray, saacadu waxay ku taagnayd 7:00 fiidnimo hawadu aad bay u daganayd, waxaase aad isku dhaadhaafayay Baabuur iyo dad tiro badan, daqiiqado ka bacdi waxaa mee-shaa imanaysa Dayaca oo ay ballan lahaayeen Daacad waxay Dayaca wadatay Baabuurkoodii yaraa, waxayna u soo labisatay si aan la arag ooh la maqal, mar-kay ka soo dagtay Baabuurka waxay si kalgacal leh u salaamaysaa Daacad, waxaana ka mid ahaa hadala-doodii.

DAYACA:-"Malaha aad baan u soo daahay?"

DAACAD:- "Maya Maya, ee waqtigii way ku taagan tahay".

DAYACA:-"Ina keen soo bax aanu tagnee, ma wax do-od ah ayaad ka qabtaa inaan tagno Gurig-ayada?.

DAACAD:- "Maya waxba kama qabo inaynu tagno"

DAYACA:-"Waa hagaag ee ina keen"

Hadaladaas ka bacdi waxaa la isku rarbayaa Gurigii Dayaca, guriga waxaa joogay Dayaca Hooyadeed, gabadh u shaqeysa, iyo waardiyaha guriga Dayaca wax gabadh ah reerka ayadaa joogta, wiilal badan oo la dhashay iyo Aabaheedna waxay ka shaqeystaan Wadanka Sacuudi Areebiya. Hooyadeed way ku kalsoonayd gabadheeda, Dayacana wax ay Hooyadeed naceb tahay ma aanay samayn jirin, waxayna galabnimadii ka sii dhaadhicisay Hooyadeed inuu caawa soo raaci doono wiil ay isku fasal yihiin waxna isla baran doonaan, waxayna hooyadeed ka codsatay in casho loo diyaariyo, Dayaca Hooyadeed arrintaas way aqbashay wayna hirgalisay.

Daacad iyo Dayaca markay gaaraan gurigii Dayaca waxaa albaabka ka furaya waardiyihii, waxayna fariisanayaan Qolka fadhiga ee guriga Dayaca halkaas oo ay yaalaan Video iyo Qalab kale oo aad u qurux badan, waxaa habeenkaa ay Dayaci ku soo dhaweysay Daacad una daartay Cajalad ay ku duuban tahay Filin jacayl ah, waxaa kale oo ay daawadsiisay albun weyn oo ay ka buuxaan Sawiradeedii ilaa maraky dhalatay illaa hadda, iyadoo isku [illegible]aysay inay u sharaxdo marxalad kasta oo

[illegible]

kadib marka ay dhammeystaan daawashada filinkaas jacaylka ah iyo sawirada Dayaca waxaa loo gudbayaa haasaawihii iyo sheekadii meesha loo yimid, waxaana hadalkii ku horeynaysa Dayaca, waayo, maadaama oo iyada marti loo yahay, waxayna fadhiyaan kuraasta fadhiga halkaas oo ay ka bilaabantay sheekadoodii jacaylka ahayd ee ugu horeysay, waxaana ka mid ahaa haasaawahoodii.

DAYACA:-"Hadimada kalgacalka lee
Dadka la hadhsanaysaa
ma hagaagto waligeed
wax uunbaa hortaaganoo
Jacaylkana halaagee
hadalkaygu wuxuu yahay
Caashaqa sidiisaba
ma marbuun habboonayn
marna miyaa la heeraa
halbowlaha la gooyaa
hadalkaas jawaabtiis
horta adaan ku waydiin!"

*** ***

Daacad:- Caashaqa sidiisaba
mar ayuun haboonayn
marna waa la heeraa
Oo halbowlahaa la gooyaa

Marka uun habboonayn
waa markaad higaadiyo
halgankii aqooneed
hawshaada tahyoo
hammigaagu maqan yahay
mar ayaa la heeraa
halbowlaha la gooyaa
waa markay heshiiyaan
laba isu habboonoo
heer fiican maraysa
Cadar kala halleeyee
hadlay aragtidaydee
halqabsigaaga ii sheeg.

DAYACA:- "Haddaan kuu sheego ujeeddadayda, waxaan rabaa in aan ka sheekaysano arrintii aan maanta kuu taabtay ayaan rabaa in aan halkii ka sii wadno, waxaan jeclahay in aan mustaqbalka nolosha wada qaybsano.

DAACAD:- Maxuma arrintani, aniga laftigaygu aad ba an kaaga helay in mudda ahna arrimo aniga i khuseeya ayaan kaaga gaabsaday, kuwaasoo aan ii suurta gelinayn in aan wax jeclaado waxaanna rabaa in aan arrintaa kuu soo ban dhigo ee wax yar dhegayso.

## Hees

DAACAD:-"Arrin lagu deg dego
amankaag dhowbaa
loo eersadee
ardaynimada dhowr
aroos gaajo laon
isku eedna iyo
ubad raaxo aalli'i
lagu ababiyaa
aayahay dishaa
is eed bay dhashaa
aqalkoo dumiyo
ambad bay dhashaa
awooddeenna garo
aqoontana xaq dhowr.

***        ***

Aayatiin ma leha
arday gefa runtee
bal ogow haddana
aayaha jacayl
aqoon lama tusoo
waysku ololayaan
ardaynimada dhowr
aqoon laga tagana
waa ammuur xun oo
haddana eedo leh

Ardaynimada dhowr
hadaad tahay mid
aad loo eegan karo
isi sugidda dheer
aad diyaar u tahay
aammin iyo e..ina
aad aad u ..di
aqbal iyo guddoon
..qoontana xaq dhowr".

Dayaca markay heestaas dhegaysato, waxay fah ..ysaa inuu Daacad jecelyahay in ay waxbarashadooda dhamaystaan ilaa ay ka gaadhayaan heer ay noloshoo da ka dhisi karaan, waxayna ogolaanaysaa fikradisi waxayna leedahay.

DAYACA:-"Waa runtaa, in inta la yaryahay la shaqay stana waa arrin sax ah, waana kugu raacay in aan isi sugno ilaa aan mustaqbalkeenna ka dhisayno.

DAACAD:-"Anigu waxaan kuu ballan qaadayaa, ballan qaad rasmi ah iyo axdi dhab ah, adna hay gaga bixin,

DAYACA:-"Waa hagaag, anna intaa in la eg baan xaj inayaa, saasaana inoo ballan ah.

Haasaawahaa iyo heshiiskaa ka bacdi,waxay isu

raacayaan gurigii Daacad, si Daacad loo sii dhoweeyo waxayna ku ballamayaan in ay si gaar ah u wada xidh iidhaan, markay iskoolka joogaan iyo markii kalaba, halkaasayna Dayaca kaga soo labanayaag Daacad,



DAYACA:-"Wax kasta waxaa ka qaalisan Kalgacalka"
DAACAD:-"Waxaan aad ugu kalsoonahay, Jacaylkeenan Curdunka ah, ee caawa aynu ahuurnay"

## ARAGGA SHANAAD

## (QOYSKII REER AYAX)

Guurku waa shay qaali ah, una baahan qorshe su gan, masuuliyad buuxda, isku kalsooni iyo is aamin labada qof ee qaddarku isugu dhacay.

Masuuliyadda guurku waxay si gaar ah u saaran tahay ninka ragga ah, in kasta oo Haweenka laftig ooda xil wayni ka saaran yahay masuuliyadda guurka.

Guurkii lagu deg degaa wuxuu keenaa furriin deg deg ah, caruur gaajaysan ceeb lagana waayo, Asl uubta, Akhlaaqadda, caqliga, aqoonta, caafimaadka iyo muuqaalka qurumeed ee jidhku, intaba waxaa kaal in muhiim ah ka qaata, helitaanka nafaqa dhcelli tiran, oo ay carruurtu helaan xilliga hore ee korii nka. Haddii ilmahaagu waayo arrimaha aan kor ku soo sheegay noloshiisu 100% raalli kuma noqonayso addu unkan aynu ku noolnahay, qayrkiina wuu ka hoosaynay aa haddiiba uu noolaado.

Hanti la'aantu waxay dhalisaa, ciil, murugo, r rafaad, walwal, xanaaq, dagaal, isdiidon, is nacayb, kala tegid iyo burbur qoys, waxaa kaloo ay keentaa ka war hayn la'aan qoys oo ka timaada xagga waalidka.

Qoyska ay ku dhacdo grrimaha aan kor ku soo sheegnay, waxay caruurtoodu u bataan inay ku dhaq ma waxyaabo ayna bulshadu jeclaysan, sida, tuugada, suuqwareeg, waxbarasho la'aan IWM.

Inkasta oo dhibaatada iyo rafaadka laga helo waaya aragnimo baddani waxaa lagama maarmaan ah in marka hore laga fikiro sidaan dhibaatooyinkaas loo gu dhicin, taasoo micneheedu tahay intaad yartahay waqtiguna kuu saamaxayo in aad shaqaysato, isna og aato awoodaada iyo in aad qaadi karto masluuliyadda qoys aad adigu xilkooda hayso. Sidoo kale kibirka iyo dheregga badan waa keenaan kala tag qoys, bar baarin xuma caruureed, is afgaran waa qoys iyo ku dayasho dhaqama shisheeye, taasoo keenta in caruur ta qoysas badan oo tijaariin ah ay garan waayaan nolosha macaankeeda kuna beddeshaan halaag iyo nol ol xumo ay dhaanto faqrinimadu.

Haddaba ma aha masuuliyadda guurka iyo reer dhisiddu mid si sahal ah laysaga dhaqaaqo, ee waa xaalad u baahan taxadir, qoraheyn, xulasho, is fahan iyo wada noolaasho dhab ah. Bal u fiirso qis adan qoyska reer Ayax oo jaangooyadii qoysnimo ka xumaatay.

Ayax iyo Cambaro waxay anaayeen wiil iyo Gabadh is gaya, waxayna ahaayeen laba dhallinyaro ah oo uuna midkoodna hanti lahayn, waxay iska jeclaad een suuqa waxayna isla garteen in ay is guursadaan iyaga oo u arkaayay in ay isku filan yihiin isna keeni karaan, laakiin waxay runiba runteeda tagtay markii reerku soo kordhay, caruurina dhexdooda ka dhalatay, masruuf keen, maanta qada ma leh, caruur baa jirran iyo caruurtu dhar bay u baahan yihiin, ayaa u badnaa buuqa iyo qaylada dhex mari jiray Ayax iyo Cambaro, talo waxay ka fursan wayday inay labadooduba dadaalaan waxayna Cambaro go'aansatay inay suuqa khudaarta yaanya ku gado bal si ay mas aariif waxoogaa ah uga hesho, waxayse arrima fara ka haaday markii uu Ayax ku dhaqaaqay imuu ka shaq aysto mukhaadaraadka, sida Qaadka iyo wixii la mid ah, arrintaasi waxay u keentay ka war hayn la'aan qoys, iyo xarig joogta ah oo uu ku mutaystay Mukhaadaraadka. Cambaro oo Ilaahay u dhaliyay karti iyo adkaysi waxay isku dayday inay korsato caruurteeda wayse awoodi kari wayday kaligeed, caruurta qoyska oo kor u dhaaftay afar Soorana ah aawgeed, oo kala ah laba wiil iyo laba gabdhood,

Gabadhoodii Curada ahayna waxay nogotay Caasi-Waalidiin oo waxay kux biirtay Gabdhaha suuqa wareega.

## TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa muuqanaya Cambaro oo fadhida suuqa qudaarta laga gado, dadka meeshaa joogay waxay siteen Dambiilo iyo lacag ay qudaarta ku gadanayeen, waxayna u badnaayeen Dumar, siiba gabdhaha suuqa ka soo adeega. Dadkaa badankoodu waxay ahaayeen Soomaali, waxaase si dhif-dhif ah uga dhex muuqday dad cadaan ah, Rag iyo Dumarna isugu jira. Dharka Dumarka Soomaalidu siteen waa iska caadi, waana dhar Soomaali.

Cambaro waxay sidatay Diric iyo Garbisaar, waxayna kor fadhidaa qudaar ay ka gadanayaan Dadka, suuqa waxaa ku badnaa dadka iyo baabuurta, waxaana kacsanaa Boor iyo bus, waxaana intaas dheeraa, kuleylka xeebta xamar oo aad u sareeyay.

Cambaro dhibtaas iyo rafaadkaas, way u adkaysan jirtay iyadoo ku dadaali jirtay sidii ay Ubadkeeda u korsan lahayd.

Ayax isagu waxba kalama uusan socon xaalada xaaskiisa iyo Caruurtiisi, wuxuuna u go'doomay,

Qaadiro iyo soo jeed, iyo gadiid qaad suuq madow ku gadi jiray. Ayax iyo Xaaskiisa waxaa inta badan dhex mari jirtay muran iyo dagaal, wuxuuna subaxyada uu yimaado gurigiisa iman jiray isaga oo qaadiraysan, mana jeclayn caruurta buuqooda iyo in lala hadlo toona; wuxuuna jeclaa inaan hurdadiisa laga kicin, doodii dhex mari jirtay isaga iyo Cambaraha waxaa ka mid ahaa.

AYAX:- "Naa Cambarooy, Cambaro naa bal ii gogol meel aan seexdo aad baan u qaadiraysnahay caruurta qeyladoodana iga fogeey".

CAMBARO:-"Ii gogol aa, gogoshaa dhacday; bal xiliguu seexanayo fiiriya muslin alow, war hoy ma sidan ayaad reer ku wadaysaa, duhur seexadka, warqadayda halkaa ii soo dhig, sidaan reer ku wadi mayside"

AYAX:- "Ah!Ah!Ahà, Alla Waa caruur caga weyna naa bal wax aad i dhagayso qaylo uun baad taqaane

"Cambarooy caqli laay
Caruurtaad wax madhaantooy
Cabasho goor walba taaganey
Taan rag ceynkii aqoonineey
Qeylo ciirsi wax moodaay

Haddaan caaw Karbaash iyo
Cududahaaga rigaaxo
Ma cidbaa wax i yeeli
Calool kiisna laheede"

*    *    *

CAMABARO: "Calkuyeey ceynka aad tahay
Ma hadaad camaan iyo
Carro iila timidoo
Ceyne iigu gii dari
Caqli xumadu waa taa
ceynkani ku yeeshee
Adigoo ciroobaad
Ciyaala suuq la socotaa
Cidla jiiff inaad tahay
Cid kastaa ku sheegtee
Caruurtaada gaajeey
Cawo kasto ku seexdaan
Adna cunidii Qaadbayd
Camankii ku baraagan
Horta coon xun baad tahay
Qaadi cunid naf moodoo
Qaadiro Walaal la ah
Ee isma qaadi karaamee
[illegible]"

Ayax intuu ka xanaaqo caydaas Cambaro, ayuu h hanjabaad iyo hadal isku darayaa, waguna dambaysii- maalaxaad iyo sababe, Cambarana way iskaga goglay- saa subaxdaas, waxaana sheekadoodii ka mid ahaa.

AYAX:- "Naa horta maxaad iigu qaylisaa xilliga kaliya ee kuu imaado, ma waxaad rabtaa inaan gurigaba imaanin, oo suuqayga se- exdo?, hadaadan eedin af xumadaas."

CAMBARA:- "Way hoogyeey oo ma awal horaa noo iman jirtay?."

AYAX:- "Haddana naga dhaaf ciyaarta oo noo go- gol waan iska dhaafayaaba qaadkae."

Hadaladaas ka bacdi way iska hishiinayaan Ca- mbarana waxay u shaqatagaysaa suuqeedii, isna hal- kaasuu seexanayaa illaa Maqrabka.

## ARAGGA LIXAAD

### Kulankii Labaad ee Jamaal iyo J...

Kulankoodii hore ayay ku hishiiyeen inay mar labaad kulmaan, waxayna ku ballanmayn Jardiin ay inta badan dhallinyaradu ku kulmaan, kuna fiican ballanta, waayo Jardiinku wuxuu leeyahay Kuraas

dhagax ah oo fadhiga u fiican, iyo dhir qurux bad an oo indhaha u roon, Iayskuna sugi karo, waxaa jeraiinkaas imanaysa Jamaad oo ay ballan lahaayeen Jamaal, iyadaana ka soo horaynaysa waqtigii ay ba llameen, wiilal ayaa ku faduulinaya meeshaas Jamaad, iyagoo damacsanaa in ay shukaansadaan, waxaana ka mid ahayd doodii dhex martay.

WIILASHII:- Wallaahi tani waa nooshahay, waa lagu dhici karaa noo, kaligeed waaye.

WIILKII 1AAD:- ku dhac noo, ama aniga ii dhaaf tan.

WIILKII 2AAD:- War adigu gabdhaha sida loo shukaan sado ma taqaanide joog meesha ha ku ceeboobine.

WIILKII 3AAD:- Tan aniga iigu faatexeeya, iguna so o dhowra, sidaan uga dhameeyo.

Intaa ka bacdi waxay wiilashu isla garanayaan in loo daayo wiilka Saddexaad, oo ay u haysteen nin ku xeel dheer xagga shukaansiga gabdhaha, wiilkii iyo Jamaadna waxaa dhex martay sheekadan.

WIILKII:- Abbaayo meeqa saac waaye?, Baabuur baad sugaysaa Noo?!

JAMAAD:- Abboowe waa hal saac oo fiidnimo, baabuurna ma sugayo, ee arrin kalaan u sugaya.

WIILKII:- Wallaahi Abbaayo waan kaa helay, waayo

jira ayaad tahay Noo, saaxiib ma qabtid-miyaa?.

Hadalkaas iyo gacanta intuu is reeciyay ayuu Jamaad Xaluska ka taabtay, kuna soo dhowaad ay, laakiin waxay Jamaad ugu jawaabtay, hadal ku lul iyo caay, iyadoo kabna ula soo baxday.

JAMAAD:- Afka ka hadal, yaa Ciyaalasuuq, wasakh, mar dambe hadaad gacanta ila soo laacda na iska jir.

WIILKII:"Abbaayo iska raali ahaaw gabar ilbax ah ayaan ku moodayee, reer baadiyaad igu noqotee, jaaw, waan kaa tegay yaah.

JAMAAD:- orod kuwaad faraha la baratay aad.

WIILASHII KALE:- Qax!Qax!Ah!Ah!Oh!Oh!, alla maxaa ku dhacay, waryaa kaalay, ma gabdhaha islaameed ayaad faraha la galaysaa,? wiilkii koobaad ayaa su'aashaas waydiiyay.

WIILKII 2AAD:-"Waryaa waligaa ma ilbaxaysid, shu kaansina waxba kama taqaanid, arr intaad samaysayna, horaa looga ga byay, oo waxaa la yiri.

"Hadaad gabadh xodxodan
sheekadaa loo xasiliyaaye
Xaluskeeda lama laaco iyo

Naaska xoodda lehe
Xangaruufo lama soo qabsado
Xanan sidiisiiye
Jeeruu xubbigu soo rogmado
malaha xoodaane."

WIILKII 3AAD:-"Wallaahi waa sax xikmaddaasi,marka an taabtay, ayay igu xanaaqday, anaana khaladka lahaa.

WIILKII 1AAD:-"war meesha inaga kexeeya ninkaa u yimid gabadhiiye, intaynaa arrin kale nooga imanin".

Wiilashii halkaasay ka tegayaan iyagoo ka baqay inay Jamaad dacwayso, kadib markii ay ogaa deen in wiilkii ay sugaysay u yimid,

## TIIMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa muuqanaya jerdiin wayn oo dad badani taagtaagan yihiin, kuwana fa dhiyaan, dadka meeshaas jooga waxay u badnaayeen dhallin yaro qaarkoodna meesha ballan ku lahaa, qaarna isaga sheekaysanayeen, lebbiska dhallinyar adu wuxuu ahaa, mid aad u heer sarreeya, inkastoo ay jireen kuwa u lebbisnaa si ka baxsan dhaqanka -Soomaalida, kuwaasoo ahaa qowmka loo yaqaan Caasi,

Jamaad waxay sidatay Diric aad u qurux badan si fiicanna loo tolay, ahna nooca qarada wayn leh ee Cawrada gabdhaha qariya, boorso dheer iyo kabe ciribta u dheer. Jamaalna wuxuu lebbisnaa surwaal iyo funaanad aad u qurux badan, kaba buudh ah iyo muraayadaha indhaha,

Jamaad iyo Jamaalba habeenkaas aad bay u dh isnaayeen, waxaana kulankaas ku dhex maraya shee kadan;

JAMAAL:-"Wallaahi sida gabdhaha qaarkood ma ihid waayo ballanteenii waad ka soo hor mart ay, oo anigiibaa kaa soo daahay.

JAMAAD:-"Wallaahi soo hormaridii dhibaatay ii ke entay, waxaana meesha isku dagaalay wi il Ciyaalasuuq ah".

JAMAAL:-"Aaway?, hadda ma i tusi kartaa?.

JAMAAD:-"Mayee macna malaha, waxbana ima yeelin.

JAMAAL:-"Jamaaday hadaad ogaan lahayd, jacaylkee nii siduu iigu sii waynaaday waad yaabi lahayd, ee bal wax yar i dhegayso!

JAMAAD:-"Bal soo daa waa hagaage, laftigaygaaba lay hayaaye.

JAMAAL:-"Gocoshada an kuu qabo

Adigaa i geliyoo
Geediga an rarayaa
Garabkaaga taallee
Naftu gama'i diidaye
Gabadhyahay maxaad odhan?."

JAMMAD:-" Godlashada jacayl Wado
eed galladeeda leedahay
gees ka eegga igu maqan
gaoma lulidda subaxdii
indha gibidh ka siintaad
goor kastaba i gaadhsiin
inaan gaar u leeyahay
kaa gudoomay aniguye
gocoshada an kuu qabo
heestanaa ku gaarsiin"

* * *

JAMAAD:-" Walaac aan arkaayuu
Caashaq waramo haystaa
weheey igu abuuroo
waanigaa wareersane
wakhtiyadaan nasanayuu
weeraraa naftaydoo
wadn[illegible]hiyo hal [illegible]

Waabaay jacayl bay ~~wakht~~

wakhti galay ba ooyaan

* * *

2. Waxaadi igu abuurteed

waayo badan qarsanaysaa

warmo ii afaystoo

weedhaada dahabkaan

sii weheshadaayoo

waayo badan ku seexdaa

wadnihiyo halbowlahu

waabay jacayl bay

wakhti galayba ooyaan"

Maalintaas Jamaal waxay u ahayd maalin farxa deed, waxaanu ku faraxsanaa jacaylka ay u muujis ay Jamaad, isagoo ku kalsoonaa hadalkeedii iyo axdigeediiba, waxayna ku ballamayaan inay sirtooda cidi ogaanin.

## ARAGGA TODOBAAD

## NATIIJADII IMTIXAANKA JAAMACADAHA

Waxaa boodh wayn oo ogaysiisyada lagu dhejiyo ku uruursan arday aad u tiro badan, kuwaas oo ahaa

ardaydii soo dhamaysatay shaqada Qaranka, Imtixaa nadana u gashay Jaamacadaha waddanka, waxaa boodh kaX lagu soo dhejiyay Ardaydii heshay Jaamacadaha waddanka iyo kuwii helay deeq waxbarasho oo dibad d ah, kuwaas oo lagu abaal mariyay ardaydii ugu buundada fiicnayd iyo kuwii shaqada qaranka u soo gutay si waddaninimo ah.

Ardayda deeqdaas waxbarasho ee dibadda lagu abaal mariyay waxaa ka mid ahaa, Daacad iyo Jam aad, labadaan Arday waxay ahaan jireen isku Dugsi.

## TIIMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa soo baxaya boodh wayn oo ku yaalla Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, waxaa ku uruursan arday aad u tiro badan, jawiga meeshaasi ma deganayn, waxaana ka dhacayay is rii xriixid iyo is jiidhjiidh, ardayda meeshaa joogt ay waxay ahaayeen dhammaan ardaydii ka soo baxday Dugsiyada sare ee dalka sannadkaas, soona dhamay satay shaqadii Qaranka.

Dharka ay sitaan waa dharkii caadada u ahaa dhallinyarada wiilal iyo gabdhaba, wuxuuna ku xi dhnaa ninba waayihiisa iyo awoodda dhar lebbisee uu leeyahay.

Ardayda qaarkood horay ayay isku yaqaaneen qaarkoodna waxay isku soo barteen shaqadii qaranka saa darteed waxay ardaydu u sheekaysanayeen koox koox iyo laba laba, ardayda qaarkood way soo fiirsadeen Jaamacadda ay ku qoran yihiin iyo inay Jaamacad waayeenba, iyaga oo xoog ku galay meeshaas waxaa ka mid ahayd ardaydii soo aragta boodhka magacyadu ku dhegan yihiin Haweeya, Ardaydii ay taqaanayna u soo fiirisay, waxaana hadaleedii ka mid ahaa:-

HAWEEYA:- Oh! Oh! Oh! alla meeshu cidhiidhisanaa m maxaa ii gaystay, waanse ku soo guulaystay, idinkana waan idiin soo arkay.

ARDAYDII:- Noo sheeg Noo sheeg, aniga ii sheeg.

HAWEEYA:- "Idhegaysta aan idiin kala sheegee, Dayaca waxay heshay Kuliyadda Caafimaadka, Aniguna waxaan helay Kuliyadda Waxbarashada Lafoole, Daacad iyo Jamaadna wax ay heleen Deeq waxbarasho oo dibadda ah.

ARDAYDII:-"Aad iyo aad baad u mahadsan tahay Abbaayo,

Ardaydii maalintaas intii Jaamacadaha heshay waxay u ahayd farxad lama illaawaan ah, intii way jayna ciil iyo murugo, sidaa darteed ardaydii Jaa

macadaha heshay farxad aawgeed, ayay qaadayaan he estan soo socota.

ARDAYDII:-"Hodansanaa Waxbarashadu
hub qaadkeeda guud iyo
haybad aan la gaadhayn
hoy lagu hirtaa weeye
higaadda maanta lagu qoray
afkii hooya weeyoo
hiddihii awoowgeen
hoy yaan la luminene
ku hirtaay Waxbarashada!"

*** *** ***

Halkay Dunidu joogtana
iyadaa u horseedee
kanti aan dhammaan iyo
waa hoy waxbarashee
hindisaha adduunkiyo
hammiyada is dabayaal
iyadaa u horseedee
hooy yaan la luminene
ku hirtaay Waxbarashada!!

Heestaas markay Ardaydu dhammeeyaan waxay ka la aadayaan guryahoodii, si ay ugu bishaareeyaan Waalidiintood, uguma sheegaan, farxadooda.

## AREGGA SIDEEDAAD

## MAYGAAG IYO IMAATINKII MAGAALADA

In mudda ah ayuu Maygaag ku tallamayay in uu mar uun reer magaalka ka mid noqdo, isagoo ka ca rayay dhibaatada xoolaha Miyiga, sidaa darteed; ayuu go'aansaday inuu Magaalada ganacsi ka bilaa bo, xoolohooda tirada badan lehna uu gado qaarko od, ka dibna Magaalada sidaa ku dego. Arrintaas Hooyadii ayuu la socodsiiyay wayna ka aqbashay, inkastoo ayna raalli ka ahayn, haddana waxay aad u jeclayd wiilkeeda guri dambayska ah, wuxuu soo jeediyana ma ayna diidi jirin.

Maygaag wuxuu ahaa Agoon Aabbihii isagoo yar uu dhintay, wuxuuna Aabbihii ka dhaxlay xoola aad u badan oo mood iyo noolba isugu jira, Maygaag W axaa la dhashay laba gabdhood oo ka waawaynaa, waxaana qabay niman hanti leh, sidaa darteed May gaag wax Xoolihii Aabbihii la qaybsaday ma jirin

Maygaag wuxuu Magaalada keenayaa Xoolo ka kooban, Adhi, Geel, iyo Lo'.

## TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa soo baxaya Sayladda Xoolaha lagu kala gato, waxaa ka dhex muuqanaya,

Maygaag oo xoola dhowr nooc ah wata, iyo laba Dil aal oo damacsanaa in ay xoolaha u gadaan, waxaa intaa dheeraa xoola badan iyo dad badan oo iyaguna Sayladda ka dhex muuqday, sidaa darteed meeshu way buuq badnayd, waxaana is dhex yaacayay dad aad u tira badan.

Dilaaliintu waxay ahaayeen niman reer magaal ah, waxayna Lebbisnaayeen dharka odayaasha reer Magaalka, sida Macawis, Koofiyad, Bakoorad ay gacanta ku haysteen iyo Cimaamado garbaha u saarn aa, Maygaagna wuxuu sitay Macawis, Shaati, Go' Tooray, Hangool iyo Waran uu gacanta ku haystay.

Maygaag iyo Dilaaliinta waxaa dhex maraysa dood dheer, waxaana ka mid ahayd.

Maygaag:-Asalaamu Calaykum, bal maanta Sayladda
Xoolaha ka warama?

DILAALKII 1AAD:-"Sayladda xooluhu maanta waa heer sare, aad baadna u nasiib badan tahay, ee xoolaha ma kuu gadnaa?

MAYGAAG:- "Mayee waxaan raadsanayaa, Dilaal aan aqaano.

DILAALKII 2AAD:-"Adeer, nagaran maysid adiguye, Adeeradaa baannu nahay ee Xoolaha noo dhiib aan kuu gadnee.

MAYGAAG:- "Waa hagaage, heerku ugu sareeya iigu gada.

DILAALKII 2AAD:-"Aad baad u mahadsan tahay, taa anaga nagu hallee, xoolahana ma inoo soo kexeeya.

Intaa ka bacdi Dilaaliintii xoolihii bay gad ayaan, waxayna ku gadayaan qiima aad u fiican, oo Dilaalku ka reeban yahay, waxayna ka gadanaya Dil aaliin kale oo dad xoolaha u gada.

DILAALKII 1AAD:-"Xooluhu waa isku duuduub, cidna gooni uga gadi mayno, ninkii isku wada qaadanaya mooyaane!

DILAALKII 2AAD:-"Waa runtaa, sidaasaana inoo habb oon, inoogana fudud".

DILAALKII 3AAD:-"Waar xoolaha meeqaa layga siinay aa, Adhiga ha layga reebo.

DILAALKII 1AAD:-"Xooluhu waa is raac, mana kala hadhayaan.

DILAALKII 3AAD:-"Waa hagaage gacanta ii dhiib.

MAYGAAG:- "Adeer Anigu gacantaad hoosta iska geliseen fahmi maayee, qiimaha ha lay sheego.

DILAALKII 1AAD:-"Ah!Ah!Ah!, Adeer waan shan iyo s



Soddon kun,oo saafi ah

MAYGAAG:- "Keen dheh lacagta.

DILAALKII 1AAD:-"Waa taase iga tiri lacagta, Duca dana na sii.

MAYGAAG:- "Horaa laygu soo duceeyay.

DILAALKII 2AAD:-"Waar inaga keen waxaan Immaanka la'le, waxba laga heli maayee!"

Doodaa ka bacdi Dilaaliintii way iska tegay aan iyagoo aad uga xanaaqsan sida Maygaag u galay, Maygaagna kaligii ayuu meeshaas ku hadhayaa, isag oo dahaqsanaa in uu ogaado, xisaabta neef kasta gooyay, si uu hadhoow Hooyadii ula socodsiiyo,

Mayagaag Magaalada cid kama yaqoon, wuxuuna u haystay in marti gelin laga helo Magaalada, sida Miyaga oo kale, wuxuuna u yeedhay, Nin reer magaal ah oo meel iska marayay, waxaana dhex martay shee kadan.

MAYGAAG:-"Adeer, Adeer!, ninka surwaalka watoow kaalay.

AYAX:- "Haye maxaad iigu yeedhay Adeer.

MAYGAAG:-"Adeer Magaalada qariib baan ku ahay, waxaan keenay xoolo, waxay ii gooyeen lacag, 35.000/= ah, haddaba waxaan kaa rabay in aad i marti geliso caawa.

AYAX :-"ah! ahò, cajiib, illayn badawnimadu waa cudur, haddaan [illegible] haysan lahaa lacag ta aad haysato, waxshadaan furar lahaa. ee orodoo lacagta cuntana ka cun, hotee lna ka seexo, meesha yaan laguugu dhicin.

MAYGAAG:-"Ma anaad i leedahay yaan laguugu dhicin meesha, waligay nimaan dhaca mooyaane, nin i dhaca ma arag, haddana orod iska tag, tala ma hayside.

AYAX:- "Waa hagaag hadaad taladayda diiday.

Intaas ka bacdi Ayax wuu isaga tegayaa, waxa ana meeshaas ku hadhaya, Maygaag oo ka yaabban me eshuu seexan lahaa iyo cidii marti gelin lahayd, wuxuuse go'aansaday, inuunan nin dambeba marti gel;o waydiisan, caawana iska qado, meeshaa uu jo ogana iska seexdo, aroortana miyigii ku laabto.

Nasiib daro waxaa in mudda ahba hadaladooda dhegaysanayay, rabayna in ay dhacaan Maygaag, laba nin oo tuuga ah, ilaashadayna lacagta Maygaag, wax ayna sugayeen, intuu ka seexanayo. Daqiiqado ka bacdi markuu Maygaag seexdo waxay tuugadii balaab ayaan qaabkii ay u dhici lahaayeen, waxaana dood oodii ka mid ahayd.

TUUGII 1AAD:-"Kaalay, Kaalay, sow ma aragtid mees
kaa bixi seexday, is diyaari haddaba.

TUUGII 2AAD:-"Waa hagaage adigu iga horree, anna
waa ku daba soconayaa."

TUUGII 1AAD:-"Waa hagaage, ina keen, iskuna celi
cudurkaagi xumaa (Sanboorkii).

TUUGII 2AAD:-"Ina shub, caawa lacag baa ii muuqata
oo hindhisi maayee.

Doodaas ka bacdi waxay u dhaqaaqayaan xaggii uu hurday Maygaag waxayna baillaabayaan siday u furi lahaayeen lacagta, iyadoon Maygaag dareemin, tuugii koobaad ayaana, madaxa Maygaag ka soo saar aya, maradii ay ku guntanayd, nasiib darose waxaa hindhisaya tuugii labaad, halkaasayna fara madhnaan ka ordayaan, inkastoo ay ku soo laabteen mar la baad, iyagoo ogaaday in uusan toosin, waxaana tuu gadii dhex martay doodaan.

TUUGII 1AAD:-"Waar soo noqo, soo noqo,! bala kugu
dhacdaye, ma sidan ayaad igula shaq
aysan, hindhisada maad celisid!"

TUUGII 2AAD:-"Alla doqonsanaa kani, waa waxaan wa
ligii iskool la gayn, warsoo ma og
id in ay hindhisadu ku jirto, waxya

baha aan la xukumi karin, hadda ina keen, mar ad dambe ku noqon maayee.

DILAALKII 2AAD:-"Waa hagaage hadduu soo tooso xit aa, ka sooyaasi mayno.



Hadalaad ka bacdi mar labaad ayay ku noqonayaan, waxayna kaseoo dhacayaan dhammaanba lacagtii Maygaag haystay waxaanay ku heshiinayaan in lacag ta midkood qaado, doodii dhex martayna waxas ka m id ahaa.

TUUGII 2AAD:-"Al-xamdu lalaahi, maxaan caawa dher
egnay, keen lacagta inoo tiriyee.

TUUGII QAAD:-"Hoo bal lacagta inoo tiri adigaa be
ri iskoolka lagu gelshee.

TUUGII 2AAD:-"Way dhan tahay lacagtu waana soddon
iyo shan kun. Ee ordoo, adna halk
aa ka bax anna halkaasaan ka baxaya
a, lacagtana berraan qaybsanaynaa.

TUUGII 1AAD:-"War meesha ka orod inagu soo toosye

Intaas ka bacdi, iyagoo aan dheg la qabto la hayn, dareemayna Maygaag oo soo toosay, ayay u ka la ordayaan laba dhinac. Maygaag markuu dareemay inay lacagtiisii maqan tahay, wuxuu ka boodayaa Jiifkii, wuxuuna u qaylinayaa kor, isagoo leh.

MAYGAAG:-"Waa wareey!waa wareey! waar yaa i dhaca
y, war yaa muslineey!.

Intaas ka bacdi isagoo aad u murugaysan, ayuu Maygaag meeshaa ka luudayaa.

## ARAGGA SAGAALAAD

## BIXITAANKII DIBADDA EE DAACAD

Aqoonta iib layskuma siiyo, caqliga iyo kartiduna waa u dhalasho. Adkaysiga, samirka, dadaalka iyo dulqaadkuna waa dhismaha nolosha.

Ninba maalin lehe, ladnaanashana ilaah lehe, waxaa la soo gaadhay bixitaankii, dibadda ee Daacad, nasiibkuna u siiyay inuu helo waxbarasho sare ah, oo heer Jaamacadeed ah.

Wax badan buu silic iyo rafaad ku soo dhammaystay, waxbarashadiisii hoose, dhexe, iyo sareba.

Quraac la'aan, qado la'aan, casha la'aan, hoy la'aan, huu la'aan, waxay u ahaayeen waxyaabaha dabeeciga ah ee sida joogtada ah uu ula kulmi jiray, laakiin cidina kama ay dareemi jirin, rafaadka Daacad haystay, horaa looyidhi!

"Waligeed adduunyada
Waqtigaa qof saacida
qofna waayahaa xidha
labadaasi waxaan ahayn
horaa laoga waayoo
waa nin iyo waayihii"

Wuu jeclaa inuu helo, intuu qof aadami idi u baahan yahay laakiin dantaa u diiday, dadaal iyo raganimo uu u dhashay, aymuu kaga soo gudbay duru ufahaa qallafsan ee soo maray, saakaana waxaa la soo gaadhay qaybtii dambe ee dhismaha noloshiisa wuxuuna diyaar u yahay, deeq waxbarasho oo uu dib adda .a helay,

## TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa muuqanaya garoon Da yuuradeed oo aad u ballaaran, aadna u qurux badan waxaa is dhex mushaaxaya, dad badan oo isugu jira nuucyo fara badan, lebbiska dadku wuxuu ahaa mid aad u bilicsan, aadna u kala duduwan, garoonka wa xaa ka baxaayay buuq iyo isjiidhjiidh, waxaana ku badnayd xiinka baabuurta, iyo dayuuradaha, waxaa si gaar ah uga dhex muuqanaysaa dadkaas Dayaca oo aad u bilicsanayd maalintaas, farxadina ka muuqat ay wejigeeda, jeclaydna in ay sii dhowayso saaxiib bkeed Daacad, waxaana ka mid ahayd sheekadii dhex martay Daacad iyo Dayaca.

DYACA:-"Aad baan ugu farax sanahay duulimaadkaag an, waxaana kuu rejeynayaa guul.

DAACAD:-"Aad baad u mahadsan tahay, sidaa aad ii
sagootinayso, waxaana kaa rejeynayaa in
aad jacaylkeenna adkayso.

DAYACA:-"Taas anaad igu ogtahay, waraaqaha iyo wa
rarkana, sid isdaba joog ah ayaan kuugu
soo dirayaa, imminkana i dhegayso, darda
~~arkayga.~~ arankaygan.

## HEES

"Safarkaagan khayrka leh
Socotaye haddaad dhiman
soo dhamayso barqshada
saadaasheennu waa guur
Salaama alla yeelyoow
Sanadaha ad maqan tahay
naftu way samraysaa
way ku sii sugaysaa
Caashaqeenna waan sidi"

***   ***   ***

DAACAD:-"Saafidaan jeclaayay
Socodkaaga quruxda leh
sii dhowayntan yaabka leh
seedaha jidhkaygiyo
wadnahayga saaqee

Sixirna yaan laguu dhigin
Saadaasheennu baabi'in
Sanadaha aan maqanahay
Caashaqa ha sii dayn!


*** *** ***

DAYACA:-"Waxaan kugu sagootiyay
Qalbi saafiypo wacan
sanadaha aad maqan tahay
qof kaloon sugaayaa
saaxiib ma noolee
haddaan sixir la ii dhigin
raggu seefta ila helin
adduunkuna si kale nqqon
Caashaqeenna waa sidi!

*** *** ***

DAACAD:-"Saansaan wanaageey
Saablayda oo idil
Saafi waad i saaqdee
Seedaha jidhkayguna
aday kuu sanqanaysaan
saadaasheennu waa guur
sirna yaan laguu dhigin
Sanadaha an maqanahay
Caashaqa ha sii dayn!

Heestaa ka baodi waxaa garoonka ka dhawaaga ya, cod makarafoon, oo dhoofayaasha ogaysiinaya bedec inay diyaaradda koraan, saa darteed Dasoad iyo Dayaca, Halkaasay ku kala tegayaan, iyagoo aad u faraxsan, [illegible] isna dhundhukanaya.



## ARAGGA TOBNAAD

## KULANKII CAWAALE IYO AYAX

Cawaale oo haysta lacag badan oo uu saaxiib kii ka soo khaayimay, kadib markii ay soo wada dheceen, nin reer miyi ah oo xoola magaalada keen ay, Cawaale wuxuu rabaa, in uu ayaamo ku tunto, wuxuuna raadinayay Ayax oo gadi jiray Qaad Suuq madow ah, Ayax wuxuu qaadka ku soo qaadi jiray bo orso dheer. markuu suuqa gaynaayo, wuxuuna ka gadi jiray, dadka uu yaqaano kaliya, si uuna xidhmin.

## TIILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa,waxaa soo baxaya Cawaale oo aad iyo aad u lebbisan, xaragana is qalqaloo cinaya, wuxuuna raadinayaa Ayax, daqiiqada ka bac di waxaa meesha ugu imanaya, Ayax oo qaad wada, waxaana dhex maraysa doodaan.

AYAX :-"Way! ahlan wasahlan! war caawa xaggee lagaaga soo degay, xaragadan xaggeed ka keentay, iyo lacagta?

CAWAALE:-"Hadaad ogaan lahayd caawa lacagtaan hayo hugaad ka carari lahayd.

AYAX:- "Caawa xagguu lacagta ka keenay waa yaabe

CAWAALE:-"Hadaad caawa ogaan lahayd, kharashka aan hayo, farxad baad dharka kuuri lahayd"

AYAX:- "War bal qaadka igala wareeg, oo lacagta ii dhiib, wax iga gataabaan la'aa Caawe.

Iyagoo qaadkii iyo lacagtii, gacmaha ku haya Ayaxna uu la yaaban yahay, lacagtaan tirada badan leh, ee Cawaale Caawa haysto, iyo meesha uu ka ke enay, ayaa waxaa meeshaas soo maraya koox Boolis ah, indhahana ku dhufanaysa qaadka ay gacanta ku hayaan, waxaana meeshaasi khatar ku galaya Cawaal e iyo Ayax, iyagoo ku sigtay in la qabto, nasiib wanaag waxay ku fakadeen, si lama filaan ah, wax ayna u kala yaaceen, ninba meeshuu is yidhi waad ku fakan kartaa.

Ayax oo aan lahayn dheg la qabto, lacagtii i yo Qaadkiina ka soo cararay, ayaa wuxuu baqihii ku ku tegayaa gurigiisii, wuxuuna, isaga oo qaylo iyo Albaab garaac isku daraya, Cambaro oo maqlaysay qayladiisa, si deg deg ah ugama ayna furin alabaab kii, waayo waxay ku xanaaqsaneed shaqadiisa, iyo waqtiga uu socdo, waxaana dhex martay doodan.

AYAX:- "Uuh! hah! oh!, naa Cambaro naa waa lay eryanayaaye albaabka iga fur.

CAMBARO:-"W.ligaaba qayli, Ilaahoow maa lagu qabt

~~[illegible]~~

bal horay u soo gal faa'iido ma lihide,

AYAX:- "Oh!Oh! naa maxaad guriga iiga furi way day, ma dhibaatadaydaad ku farxaysaa?!

CAMBARO:-"Horaan kuu idhi ka badh qaadka, waanad i diiday, wax kastoo kugu dhacana waan ku farxayaa.

AYAX:- "Naa maanaad saa iila hadlaysaa, nacdal baa kugu taale, cadawyahow!"

Ayax intuu cadhoodo, xanaaqii iyo khasaarihii qaadkii uu ka soo cararayna dib u xasuusto, ayuu isagoo iska war la' bakoorad uu haystay Cambaro ku jejebinayaa, Cambarana xanaaqii iyo xanuunkii ayay alwaax madaxa kaga dhufanaysaa, waxaana labadoodii dhex maray dagaal xun, iyagoo isku geystay dhaawa cyo halis ah, waxaana ka dhex dhacay buuq, qaylo ay dhammaanba deriskii iyo xaafadihii u dhowaaba ku soo tooseen, waxaana kala qabtay, deriskii.

Ayax xanuunkii iyo xanaaqii ayuu wuxuu ku da laaqayaa Cambaro, wuxuuna deriskii u sheegayaa in caawa laga bilaabo, ay ka furan tahay, gurigana si dhaqso ah looga saaro.

Derisku waxay isku dayayaan wanwaan, laakii n Ayax arrintaa lama marsiinayo, deriskiina waxay kaxaynayaan Cambaro. hal kaasayna ku kala tageen.

## ARAGGA KOW IYO TOBNAAD

## KULANKII HAGARLA, DYACA, DAGE IYO DANAYSTE

Hagarla oo ay ballan lahaayeen Dayaca iyo la ba wiil oo kale, waxay damacsan tahay in ay shir qool u dhigto Dayaca, oo ay isku iskool ahaan ji reen, intaynan hagarli iskoolka ka bixin, noqonina Suuq wareeg, duur gal ah, waayo Hagarli horay uga go'doontay reerkoodii iyo waxbarashadeediiba, wax ayna ka doorátay Dibjirnimo, iyo la tumashada rag ga, sidaa darteed waxay mudaba ku tallami jirtay inay marin habaabiso gabdho badan oo dhowrsan.

Hagarla waxay in mudda ah dabin u dhigaysay Dayaca, Caawa ayayna Dayici u soo gashay shirqool kii ay la maaganayd, waxayna la ballantay laba wiil oo ah kuwii la shirqooli lahaa Dayaca,

Hagarla waxay Dayaca ka codsatay in hal habe en ay meel u maacdo, iyadoo u sheegtay in ay alaa b la soo gadayso, taasi oo ay Dayaca ka yeeshay,

### TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa muuqanaysa Hagarla oo meel taagan kaligeed, sugaysana dadkii ay la ball antay, oo ay ka mid ahaayeen Dayaca, Dage iyo Dan ayste, Hagarli waxay lebbisnayd dhar gaagaaban, oo aan caado u ahayn dhaqanka Soomaalida, waxaa garab ka u surnaa boorso dheer oo ah kuwa lagu yaqaano Gabdhaha Caasiga ah, waxaa kaloo ay gashanayd Fu naanad, kaba ciribta u dheer, waxaana u daarayd Xabbad sigaar ah oo ay gacanta midig ku haysatay iyada oo aan kala xishoonayn, dadka dariiqyada ma raayay, dad badan ayaa waxay la yaabanaayeen, ga badha sigaarka cabbaysa ee jidka taagan, Dumar badan oo ah kuwa sharafta leh waxay hoosta ka lah aayeen, alla ku ceebeey tanoo kalaa dumar ... ceeb eysay, dhaqankiina ...



Baabuur badan ayaa jidka u is taagayay Hagarla, kuwaasoo damacsanaa in ay horay u sii qaatan maadaama ay ka muuqato astaamihii Caasinimadu, laakiin Hagarli, habeenkaas diyaar uma ahayn in ay baabuur cad raacdo, waayo waxay fulinaysay qorsha kale, intay sugaysay dadkii ay la ballan

sanaydna waxay isku maaweelinaysay erayadan.

HAGARLA:-"Raaskii Aabahay iyo
hooyaday rugteedii
ma raboo ma raadsado
reerkaa dhibkiisiyo
raadintii waxbarashada
raafaadkeeda maba rabo
maa raaxaysto kaligay
raggan suuqa buuxee
raadinaaya dumarkuun
raysamaalka uu wado
maa ka reebo oon cuno
reer aan [illegible]agleeliyo
guur raadis maba rabo
Caasi raaliyaan ahay"

Hagarla iyada oo weli hadalkeedii sii wadata xabbadii sigaarka ahaydna ka daba shidatay mid kale, rabtana in ay dejiso, qorshihii ay ku soo gacan gelin lahayd Dayaca.

Hagarla waxay cadho gabowday u qabtay Daacad oo Dayaca saaxiib dhab ah yihiin, dibaddana ugu maqan Waxbarasho Jaamacadeed, waxayna rabtaa in ay Dayaca iyo Daacad is gefsiiso, waayo Daacad markay, Hagarla Ardayadda ahayd, isku dugsigana ahaayeen, ayuu caayi jiray gabdhaha caasiga ah, sidaas darteed waxay go'aansatay in ay jaaylkiis a Caasinimada barto, saana kaga aar gocsato, waxaana ka mid ahayd hadaladii Dayaca iyo Hagarla dhex maray markay isku yimaadeen.

HAGARLA:-"Abbaayo waxaan galabta rabaa, alaab iyo
khudaar aan Af-gooye u doonanayo, inaad
ila soo gaddo, waxaana in [illegible] qaadaya
Wiil walaalkay ah iyo Saa[illegible].

DAYACA:-" Abbaayo haddaan horay u s[illegible]
waxba kama qabo"

Iyagoo saa u sheekaysanaya ayaa waxaa iman aya Danayste iyo Dage oo Baabuur wata, kuna yimid ballantii ay lalahaayeen Hagarla.

Danayste iyo Dage labaduba way la socdeen qorshaha Hagarla damacsan tahay, waxayna ballan qaadeen in ay fulin doonaan gabadhaasna suuqa soo gelin doonaan, iyagoo isticmaalaya xeelado u gaar ah, sheekadii dhex martay gabdhihii iyo wii lashiina waxaa ka mid ahayd.

HAGARLA:-"Weey soo dhowaada soo dhowaada, barasho wanaagsan, gabadhan waxaa la yiraahdaa Dayaca, waana gabadh aan isku Arday ah aan jirnay waqti hore"

DANAYSTE:"Barasho wanaagsan, Barasha Wanaagsan" Aniga waxaa lay yiraahdaa Danayste, wii lkanna Dage.


DAYACA:-" Barasha Wanaagsan"

HAGARLA:-"Horta barasho intaasi inoogu filan, Ga badhuna inay dhakhso soo noqoto ayay rabtaa, oo gurigooda ayaa laga sugayaa ye ina dhaqaajiya.

Intaa ka bacdi waxaa laysla garanayaa in ba abuurkii la raaco, lana bilaabo safartii lagu ma gacaabay in Af-gooye la tegayo, wuxuuse ahaa saf ar shir-qool ah, oo Dayaca loogu tala galay, wax aase la yidhi"Sirmaqabe allaa u sahan ah"

Baabuurkii markuu ag-marayo, Baar Xaraf oo u dhexeeya Xamar iyo Af-gooye, ayuu Danayste gab dhihii ka codsanayaa inay ka casheeyaan Baarkaas inkastoo ay Dayaca arrintaas diiday, haddana waa lagbaday, waxaana la ogolaysiiyay in meeshaa lag a casheeyo, maadaama ujeedda kale laga lahaa.

Dayaca waa maalintii ugu horaysay oo ay baar ka cashayso, miisna la fariisato, nin ayna garanayn, waxayna la yaabbanayd naago iyo



niman fara badan oo miisas wada fadhiyay, qaark oodna gurya yar-yar oo mudduls ah isla sii gela yay, ujeedadoodana ayna garanayn, Dayaca iyo Danayste waxay fariisteen miis gooni ah, oo waxaa u fiiraaqeeyay Hagarla iyo Dage oo miis aan saaga uga dheerayn fadhiyay, [illegible] Danayste iyo Dayaca waxaa dhex martay sheekadaan.

DANAYSTE:-"Abbaayo hays martiyayn, maxaad cuni Maxaad cabbi, wax dalbo.

DAYAGA:-" Wallaahi walaaloow waxaan cunaba gara n maayo, waayo waligay Baar wax kama cunin, waxaanan u haystaa ceeb, cunta da Hudheelada, ee Adigu iska cashee"

DANAYSTE:-"Maya!Maya! sidee waaya adiga, soow adiga gabadh reer magaal ah u eg"

Danayste wuxuu ku khasbayaa inay cashayso Dayicina way iska ogolaanaysaa, Danayste dhowr jeer ayuu ku fikirayaa, in uu cabbitaanka wax maskaxda dooriya ugu daro, sida Khamri ama Kinii n, suu uga dhamaysto ujeedooyinkiisa, laakiin uma ay suurta gelin, Dayaca oo ahayd Gabadh taxa dir badan ah lawgeed, aana isaga fiirinaysay wax kastoo loo keeno.

Danayste markay u suurta geli wayday arrinta asi,-isla markaana uu arkay, dhowrsanaanta Dayaca wuxuu go'aansaday inuu guursado, maadaama ay aad iyo aad u qurux badnayd kuna dhowrsanayd, wuxuuna ka soo galaysa dhinaca guurka, isagoo adeegsaday aftahan-nimo iyo waaya aragnimo, kuna beer laxaw saday Jacayl iyo hanti uu u sheegay, waxaana ka mid ahaa ereyadiisi.

DANAYSTE:-"Dayacaay, dabuubtayda dhegayso
waxaan ahay nin dekeeya
oo Ilaah deeq dhan u dhiibay

Dumarka taan yara doono
deg deg baan ku helaa
ee haddii aynu dalxiisno
oo aan dal shisheeye ku geeyo
ma doodbaad ka qabtaa?"

DAYACA:- "Wiilyahow haybadaadiyo
hantidaadu i deeqdaye
hadalkaagan wanaagsan
haye inaan ku idhaahdo
caawa ila habboone
hanti baa laysku raacee
hayaan kuugu jawaabay"

Hadaladaa ka bacdi waxaa danayste u muuqanaya inuu ku guulaystay hadafkiisii aahaa guurka, wuxu una go'aansanayaa imuu isla caawa loo mehriyo, wa ayo wuxuu ka cabsi qabay inay Dayici is bedesho haddii ay Xamar ku laabtaan iyadoo aan mehersanayn, wuxuuna ogolaysiinayaa in ay caawa is mehersadaan kana faa'iidaystaan, Cagaaran oo u dhowayd, waxaa na sheekadoodii ka mid ahayd.


DANAYSTE:- "Waxaan filayaa in aynu is fahanay, ani guna markii horaba maan rabin in aan kugu ciyaaro, waxaana waligayba raadin ayay gabadh fiican oo aan guursado, ee haddii aynu isasoo mehersano caawa maxaad ka qabtaa?"

DAYACA:- "Horta arrintu ma xuma, laakiin in aan is barano, ayaa ila habboon in mudda ah.

DANAYSTE:- "Soomaalidu waxay tiraahdaa"Nimaadan sa acad ku baran Sanad kuma baratid"

DAYACA:- "Waxba kama qabo hadaad adigu garatay"

DANAYSTE:- "Hadaad i fahantay ilana garatay ujeeda daydii, ina keen aynu u sheegnee saaxi ibadeen, cagaaran inaynu tagaynee"



Danayste iyo Dayaca, way is taagayaan waxayna Dage iyo ~~ØA~~ Hagarla u sheegayaan inay heshiiyeen, rabaana in ay isasoo mehersadaan. Hadalkoodiina waxaa ka midahaa.

DANAYSTE:-"Laye!Haye, soo baxa, Hagarla iyo Dag[illegible]w s[illegible]w, Baabuurka soo [illegible]raaca waan gegay naaye!"

HAGARLA:-" Oh! Maxaa dhacay, m[illegible] is fahmi waydeen!"

DANAYSTE:-"Mayee waxaabaan isla garanay in aan is guursano ee [illegible] soo baxa.

Intaas ka baodi waxaa baabuurkii u jeesanay ilaa Cagaaran, waxayna sheeka xiisa lihi sii dhex maraysaa, Danayste iyo Dayaca intay dhexda sii s oodaan, Hagarla iyo Dage aad ayay uga xumaayeen meherkaa ay maqleen, mana ay jeclayn in wax meh er ahi meesha yimaado, heshiiskooduna saa ma ahayn ee wuxuu ahaa in la shir qoolo Dayaca, laakii arr intu waa is bedeshay.

Dayaca waxay hilmaantay Jacaylkeedii dibadda ku maqnaa waxayna ka dooratay, hanti iyo Lacag iyo nin ay hal habeen ku baratay, hilmaansiiyayna Jacaylkeedii hore.

Muddo ka baodi waxay gaadhayaan tuulada Cag aaran oo ku taalla Gobalka Sh/hoose, una dhow ma gaalada Marka, waana meesha ay isku mehersadaan raggafdumarka isla baxa ama is meher xada.

Xilli fiican ayay ku aadayaan, Cagaaran, wa xayna la kulmayaan Qaadigii iyo shaqaalihiisii waxaana dhex maraysa sheekadaan.

DANAYSTE:-"Asalaamu Calaykum Sheekh"

QAADIGII:-"Wacalaykuma Salaam"

DANAYSTE:-"Sheekh waxaan rabay in gabadhan la ii mehriyo"

QAADIGII:-"Gabadhu waa tee?, haa ma tanaa, adeer raalli ma ka tahay in laguu mehriyo ninkan?"

DAYACA:- "Haa Sheekh Raalli iyo Radhbaan ahay.

QAADIGII:-"Alla tani geesiyad, gabdhahaan arki jirayba maaha, ee iyaga oo ninka raba hadduuna aamusi jiray"

DANAYSTE:-"Haa sheekh waa Gabadh wanaagsan"

QAADIGII:-"Gabadha meherkeeda sheeg"

DANAYSTE:-"Sheekh Wax alla waxay doonto"

QAADIGII:-"Adeer sheego meherkaaga"

DAYACA-

DAYACA:- "Sheekh wixii la igu mehriyo waxba kama qaboo, ee idinku i gudoonsha!

Intaa ka bacdi, halkaasaa lagu mehrinayaa Dayaca, waxayna ku soo laabanayaan Xamar,

Danayste wuxuu u sheegayaa Dage iyo Hagarla in aroos deg deg ah la qaban doono, sidaas darte ed wuxuu farayaa in asxaabta loo sheego habeenka Arooska waana Jimcaha soo sooda iyo Hotel Jubba, iyagana wuxuu ka codsanayaa in ay la shaqeeyaan inta uu arooska ka baxayo.

Dayaca arooskaa deg dega ah iyo meherkii ka horeeyay, midna dood kama keenin, waxayna ka aha yd raalli, maadaama ay u baraedhay, wax ogaysiis ah oo ay reerkooda la socodsiisay ma jirin, mark ay Xamar ka baxaysay, markay meherkeedii u sheeg tayna waxaa laga soo eryay gurigoodii, waxaana laga dhigay Dayro, waxayse ku soo laabtay gurig ii ninkeeda Danayste, isna wuxuu u dhigay Aroos deg deg ah.

## ARAGGA LABA IYO TOBNAAD

## BIXITAANKII DIBADDA EE JAMAAD(WAXBARASHO)

Jamaad waxay ahayd Gabadh nasiib badan, aad iyo aad ayayna u dadaali jirtay, Ardaynimadeedii waxay nasiib u heshay inay ka mid noqato Arday deeq waxbarasho oo dibadda heshay, Ardaydu way k ala hor baxeen, oo waxaa kala duwanaa Jaamacadaha ay ku kala qoraayeen, waxaana la soo gaadhay xil igii ay bixi lahayd Jamaad, iyadoo Arday badan oo Soomaali ihi uga horeeyaan Waddanka ay ku socoto.

Jamaad waxay ahayd gabadh aad iyo aad u dho - wrsan, isku kalsoon, waxaa aad u jeclaa, wiila l fara badan, waxaase si gaar ah xidhiidh ulal- ahaa, Jamaal oo lagu xaman jiray inay saaxiib yihiin.

Jamaal isagu aad iyo aad ayuu u jeclaa Jamaad, wuxuuna u hayay Jacayl dhab ah, laakiin Jamaad waxay kula socotay Khiyaamooyin iyo beer laxawsi, waxayna rabtay, haddii nin ka lacag badan ama ka wanaagsan, ay hesho inay ka baxdo jacaylkiisa, iskana raacdo ninkii kalee dookheeda ka helo, waayo rag aad u tira badan ayay sheeko oyin gaar ahaaneed la lahayd, dhamaantoodna waxay isku haysteen jacaylka Jamaad, oo rag badan ayaa ku kala dhintay, iskuna dili gaadhay.

Jamaad marba midkay la joogto ayay jacayl u sheegi jirtay, iyada oo ku tilmaamaysay kuwa kale inay iska kari la'dahay, laakiin ayan rabin iyadu, Jamaal oo dhowr jeer waydiiyay ragga badan ee ay la socoto, waxay ku qancin jirtay, "Masayrloow Maskax maleh; iska saar cuqdadda, adiga mooyee ma nin kalaa jira IWM.

TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa muuqanaya Jamaad oo loo miisaamayo alaabo badan oo ay u qaadaysa Ardaydii Jaamacadaa waddanka ay ku socoto uga horaysay, waxaa si gaar ah u muuqanaya Jamaal oo boorsadeeda wayn ee alaabta ugu jirtay u sida si fiicana u sii dhowraynaya, dharka ay sitaan aad buu u qurux badnaa, waxaa iyaguna meeshaas joogay dhallinyaro badan, oo rabay in ay waraaqado ugu dhiibaan Daacad, oo ay rabeen in ay uga warramaan Arooroska Dayacan iyo khaladka ay samaysay, waxaa garoonkaaka muuqday dad aad u tira badan oo meeshaas muuqaalka dhigay. Intaynan imanin diyaaradii qaadi lahayd dhoofayaasha,

waxay dardaaran iyo sheeka dhex maraysaa Jamaad iyo Jamaal, waxaana ka mid ahaa erayadoodii.

JAMAAL:-"Jamaaday waxaan kaa rejeynayaa in aadan axdigeenna ka bixin, ina iloobin.

JAMAAD:-"Sideen kuu illaawayaa Abboowe, in aad Adigu i iloowdo mooyee"

JAMAAL:-"Waa hagaage i dhegaysaan kula dardaarme


"Aan ku sii dardaaree
digniintaydu waxay tahay
Dumarku jeebkaey raacaan
ragna waxay ka doortaan
midka doolar haystee
sida dumarka qaarkood
daa'im yaanu kaa dhigin
dantaaduun ku ekoow
debnahaaga how furin
wiil dibadda joogoo
caashaqeennu yuu dumin
dardaarankeennu waa kaas
duulimaad wanaagsane
dalka nabad ku soo noqo"

JAMAAD:-"Alla Hadduun baan ku fahmay, horta wali gaa masayroow baad tahay, markastana rag baad sheegtaa, ee ma waxaad rabtaa in aad adigu axdigeenna ka baxdo.

JAMAAL:-"Maya!Maya! ee waxaa jira rag dibadda jo oga oo gabdhaha lacag iyo dahab ku harq iya, illowsiiyana jacaylkoodii, ee Adoga kaama shaki qabo"

JAMAAD"-"Anigu kuwaasoo kale ma ihi, ee adigu is ka ilaali Caasiga Kamar.

Hadaladaa ka bacdi, waxaa dhawaaqaya matoor kii Dayuuradda, waxayna Jamaad u koraysaa si deg deg ah, waxayna gacmaha uga soo haadinaysaa Dayu uradda alhaabkeeda, saasayna ku duulaysaa.



JAMAAL:-"Tacliintuun ku ekoow
Talaalkeenna Caashaqa
Tunka yaanan laga jebin
Tilmaantaadu waa amiʼ

## ARAGGA SADDEX IYO SODONAAD

### KULANKII DAACAD & XOGHAYNTII JAAMACADDA DIBADDA

Daacad oo weli waxbarashadiisii dibaddu u socoto axdigii Dayacana aan ka bixin, laakiin ka yaabban war iyo waraaq la'aanta ka haysata Dayaca, ayaa maalin kasta wuxuu ka fiirsan jiray xoghayntii Jaamacadda uu dhigto wax waraaq ah oo ay Dayaci u soo dirtay, wuxuuse la kulmi jir ay, Calool xumo iyo xanaaq, waayo markasta wux uu arki jiray waraaqo badan oo saaxiibadii ku socda isagase wax magaciisa ku socda ma uusan arki jirin, taasina waxay u keentay inay marar badan iska hor yimaadaan XXX Xoghaynta Jaamaca dda, waayo Daacad wuxuu u haystay inay waraaqi hiisa lumiyaan, marnana ma aaminsanayn in ay Dayaca waraaqaha ka goosan doonto, illayn waa n nin wax jecele.

Daacad dhowr jeer buu ku sigtay in uu iyad a darteed fasax u soo qaato, Jaamacaddana iskag a yimaaddo, si uu u ogaado waxa ku dhacay, Daac ad si A xad dhaaf ah ayuu u jeclaa Dayaca, maxa ase ka dambeeyay?

Dhalliyarada hadda axdigu waxba lama aha, qaadidiisuna way la fududahay, ka bixidiisuna w axba lama ah, waxayna ka sheegaan afka oo kaliya ee quurkaoda ma jiro, niyadna kama aha.

Dayici waxa xay samaysay, Daacad waxba ka lama socdo, welina jacayl buu u hayaa.

### TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa soo baxaysa Jaama cad ku taalla Waddanka Kanada, waxaa si gaar ah u muuqanaya Xafiisyadii Jaamacadda oo ay joogaan

Hormoodkii Jaamacadda, Macallimiinta Jaamacadda wax ka dhiga iyo Xoghaynta Jaamacadda, dharka ay sitaan waa dharka ay reer Yurub isticmaalaan, Xafiiska Xoghaynta waxaa ku dhex murmayay Daacad iyo Gabadh ka mid ah Xoghayntii Jaamacadda, wuxuu Daacad ku eedaynayay Jaamacadda inay waraaqihiisu yimaadaan, laakiin iyagu lumiyaan, waxaana dhex martay doodaan.

DAACAD:-"Saba, Pleace have you any Letters for me?
SABA:- "I haven't any letters for you."
DAACAD:-"Impossiple!"
SABA:- "Why?."

Murankaa ka bacdi iyagoo arrintu meel xun ka marayso, Daacad iyo Gabadhaas, ayaa waxaa irridka xoghaynta ka soo galaya hormoodkii Jaamacadda oo hor socda Lix Arday oo Soomaali ah, horayna Jaamacadda ugu qornaa, kana mid ahaa kuwii deeqda waxbarashada helay, una yimideen inay waxbarasha doodii billaabaan, Ardaydaas oo ay la socotay Jamaad iyo dhowr Arday oo kale oo ay Daacad isku iskool ahaan jireen Dugsigii Sare.

Daacad iyo Ardaydaasi way isku soo boodayaan waxaana dhex maraysa, salaan walaalnimo, Daacad ciilkii iyo cadhadii halkaasuu ku illaawayaa, wuxuuna Ardayda kala hortegayaa su'aalo ku saabsan in ay waraaqo u wadaan iyo in kale.

Ardaydu, waraaqahay u wadeen ayay siinayaan waxayna Jamaad u xilsaarayaan, in ay si gaar ah ugu warranto, maadaama ay isku iskool ahaan jireen Daacad, Dayacana ay saaxiib ahaan jireen,

Markii Ardaydii la dejiyay Jaamacaddii, ayaa waxaa is raacaya, Daacad iyo Jamaad, si ay u ugu sheegto arrinta ay Dayici samaysay, waxaana dhex martay sheekadan.

DAACAD:-"Wallee waxa layga qarinayaa, wax ka wayn
Jamaad maad warka ii taataabatid?"

JAMAAD:-"Waraaqaha aan ku siinay horta akhriso, ana
a war kuu hayee.

Intaas ka bacdi Daacad wuxuu furayaa warqadii ugu saraysay, waraaqihii tirada badnaa ee loo soo diray, waxaana kaga soo baxaya erayadan.

"Waan ka xumahay, in aan warkan naxdinta leh kuu soo diro, laakiin runtu ragga kama ma nixiso, waxaanan rejeynayaa in aadan qalbiga aga raabinin arrin iska caadi ah, oo ay qarn iyadan dambe gabdhuhu sameeyaan, caadina ka dhigteen, waxba yaanan hadalka kugu daaline Gabadhii Dayaca ahayd waa la guursaday!"

erayadaas guurka ah markuu arkay miyir iyo maanba wuu iska waayay, naftiisiina wuu xukumi kari waay ay, wuxuuna ku sigtay inuu dhaco, laakiin Jamaad baa qabatay, waxayna tidhi.

JAMAAD:-"Alla Daacadoow beer jilicsanidaa, ma naag
xunbaad niyadaada raacinaysaa?!.

DAACAD:-"Axdi ma leh Haweenoo
rag bay adhaxda gooyaan
rafaad iyo dhibaatay
dhakhso kuugu reebaan
runtay been ka sheegaan
rag kalay la haystaan
inta aad rafaad iyo
caashaqa la rarantehee
ragow dumar ha aaminin
ha rumaynin hadalkood
hadimaday qarinayaan
hadalkay maldahayaan
haasawa beentood
rag baa lagu halaagoo
hablaha maanta joogaa

Waa waña hankaasoo
caashaqa lagama helayoo
layskuma halleeyee
midii ani i heertee
halbowlaha i goysayna
haatan maxaan ka yeelaa?!

JAMAAD:-"Weli ma sii calaacalaysaa?"

DAACAD:-"Waa yaab! waligay kuma seexan, Dayacaa ku khasyimi, laakiin waa adduunyo!"

JAMAAD:-"Ina abti intaad iska dhaafto calaacalka hadaad u baahan tahay gabadh aad guursato oo Dayaca ka wanaagsan, anaa ku ba raya, gabdhihii maantay ila sooday, mid aad doonto, ayaan ku barayaa"

DAACAD:-"Adigu xaaslay miyaad noqotay, mase saa xiib baad yeelatay, waadigan gabdhaha kale ii tilmaamayee?"

JAMAAD:-"Maya laakiin, waxaan rabaa in aan gabdh aha mid ku baro, aniga waad i ogayd adiguba inaan guur iska daayay waayahan, ilaa aan heer gaadho!"

DAACAD:-"Soomaalidu waxay tiraahdaa"Afkaaga wax aad ka tiraahdo, agtaada ka day", aniga waxaan Dayaca kaga samri karaa in aad Adigu kaalinteedii ii gasho!"

JAMAAD:-"Alla ina abti ma anigibaad isku kay soo rogtay?, laakiin hadaad ka caafimaaday so Dayaca, waxba kama qabo!"

Daacad isagoo ka faa'iidaysanaya rabitaanka dhow ee ay muujisay Jamaad, [redacted] damacka ga lay quruxda Jamaad, muxuu[redacted] go'aansaday inayna Jamaad dhaafin, mar haddii Dayaca laga dhacay.

Jamaad iyo Daacad waxay ahaayeen qaraabo, waxayna iskugu aadanaayeen ilma Abti, sidaa dar

teed aqoon fiican bay isku lahaayeen, yaraantoodii-na hoosta ayay iska jeclaayeen, iayagoon wax sheeko gaar ahaaneed oo mustaqbal aan yeelan, ayay Dayici Daacad jeclaatay, halkaasuuna ku kala hakaday is-rabitaankoodii, nasiib wanaag waxaa isku soo celi-yay waqtiga iyo calafka, sidaa dateed ayay ugu fu-dudaatay inuu Daacad jacaylkiisii ku wareejiyo Ja-maad, waxayna ku heshiinayaan inay halkaa isku me-hersadaan, Soomaaliyana tagaan iyagoo is qaba.

Jamaad, Daacad way ka qarisay in ay is jeclaa-yeen Jamaal, intuu Soomaaliya joogayna Jamaal iyo Jamaad midkoodna waxba uma sheegin Daacad, taasaa keentay in Daacad mehersado Jamaad, Daacad intuu Jaamacada baranayay dhinacna wuu ka shaqeesanayay, alaabtii Arooskana hore ayuu u diyaarsaday, lacag fiicana wuu haystay, wuxuuna jeclaa inuu Shahaada-da Darajada Labaadna ku soo dhamaysto Wadanka uu joogo, waxaase iyadu Shahaada heerka koowaad mar-kay dhammaysato ka soo hor laabanaysa, Jamaad, oo soo qaadaysa Alaabtii arooskooda iyo Baabuur Da-acad u soo gaday Jamaad, waxayna soo baratay Jamaa d Cilmiga Caafimaadka, sidaas ayayna wadanka ku imanaysaa iyadoo Xaas ah Daacadna u mehersan.

## ARAGGA AFAR IYO TOBNAAD

### KULANKII AYAX, MAYGAAG, DUUFIYE IYO HAGARLA'

Waxaa si isdaba joog ah isaga daba imanaya iy-aga oon war iska hayn, qofkastana tiisa culleysay, Ayax, Duufiye, Maygaag iyo Hagarla' oo ay dhammaan tood haysato dhibaatoyin kala duduwan, waxayna si nasiib ah ugu kulmeen meeshaas, wuxuuna mid kastaa ba ka calaacalayay dhibaatooyin haysta.

## TIILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa muuqanaya "Ayax, Duufi ye, Maygaag iyo Hagarla", waxaa dhammaantood ka mu uqata diif xun, waxaana midkastaa damacsan yahay inuu muujiyo dhibaatadiisa, waxaana ka mid sh... ha ... ...

AYAX:

"... ... amaan aqoon
Oo haldana duufsan baa ... e
Duqdaydii i wanaanini jirt...
Waa ...ii dilaye
Guri ... ah
Haddaan ...os fadhiyo
Oo hogosha ... aadlaadshay
Habaar qabihi qaadkae
Aniga qeyrkay iga reebay
Qaadiro iyo soojeed
...taan ani ku qoondoobay
Qe... kar ...alkiu gaaray baan
Wali ...a q...iroone"

*

DUUFIYE: "Xatooyada inkaan wada tagnay
Xalay la soo jeeday
Xa...i iyo kulley iyo
Ninkaan xumo ka dhowraayey
Xoolaha rag leeyahay
Ninkaan xooga kula qaaday
Waa kaa xayuubsaday
Wixii xalay na soo galaye
Xumaantaa Ninkii iila yimid
Ee xaalkan i marsiiyay
Xabaashiisa inaan aan u qodaa
Soo xaq sax ah maaha".

MAYGAAG.

"Waqtiyadii i soo maray
Wax aan idiinka sheegee
Waayo hore oon dhaweynbaa
anoo Wiil ah la i dhalay
Weynaaday aniguna
Waax qaaday Noloshài
Warka reer Magaalkaan
Waligay jeclaan jiray
Wax qabadkeeda fududeen
Waxyeelada la lahayn baan
Waayo badan u jeelaa
Waxaa raadiyoba imid
Waqti badana soo dhaxay
Gaday xoolahaan waday
Wahay daalkii baasaa
Duliyadii haahiiyee
Lacagtaydii dalabsaday
Duli Reer Magaal iyo
Doqonay ahaayeen
Anoo daalan ila hallay
Duunyo waa la dhici jiry
Ragna waa la dili jiray
Danayn maayo xaalkanoo
Dani igama haysee
Dullisanaa Magaaladu".

* * *

HAGARLA'S: "Maxaan Wiil fiican waaloon
Maalkuu lahaa leexsadaan cunay
Maalmaha tiradoodu go'an tahay
Maqsuudkaan lahaa ma gaaray
Macaansaday Maal rag leeyahay
Muraadkiisa aan u oofshay
Mirqaanku markuu dhammaaday
Gaadi cishqi aanu maalay
Maxaan goob cidla ah fariistay
Faa'iido maxaan ka waayay
Falkii xalay aan samaayay
Maxaa fool xumo siyaadsaday
Maxaan seexday Suuqyo fara badan
Hablaha sidaan ahay arkaayoow
Hadaad socotaan Habeenkii
Middaan suuq wareega dayninit
Annaa silicaas eedaye
Wallee saxariir way heli".

Calaacalkaas ka bacdi, way is wareesanayaan waxaana is fahmaya, Ayax iyo Gabadhiisa Hagarla ah, markuu fahmo inay Gabadhiisa tahay, ayaa miyir ugu dambaysay wuxuuna ku dhacay Dhulka, Hagarla' oo iyaduna naxdin intaa la ag ku dhacday, ayaa Aabah eed ku foorarsanaysa, kuna dul ooyeysa.

Duufiye iyo Danayste oo iyaguna is fahmay, Danaystan ogaaday inuu yahay ninka xoolihiisii dh acay Duufiye iyo Saaxiibkii ayuu xanaaqii toorey Caloosha ku kala jarayaa, Duufiyana halkaasuu ku nafbaxayaa, Maygaag markuu ogaado inuu Nin dilay orod ayuu Magaalada kaga baxayaa, isaga oo baxsad ah, nasiib wanaag isagoo la qaban, ayuu Miyiga ku laabanayaa.

Daqiiqado ka bacdi waxaa meeshaa ay masiiba du ka dhacday imanaaya Koox Boolis ah, oo buuqii iyo dhiigii meeshaa ka dhacay la kulmaysa, waxaan a meeshaas lagu xirayaa Hagarla' iyo Aabeheed oo barta shilku ka dhacay loogu yimid, Meydkiina he raa loo qaadayaa waxaana la geenayaa Saldhiga, wa xaana Maxkamad la soo taagayaa muddo ka bacdi Hag arla' iyo Ayax, iyaga oo loo haysto sababta Duufi ye u dhintay, iyo waxa meesha isugu keenay.

## ARAGGA SHAN IYO TOBNAAD

## FURITAANKII DAYACA

Guurku fudeed kuma haboona, horaana loo yiri "Hubsiino halbaa la siistaa" barashada ragga iyo Dumarku ay isbaranayaan, iyagoo ugu dan leh inay mustaqbalka wada noolaadaan, reer cusubna dhisaan maaha wax ciyaar ah, ee waa arrin loo baahan yahy in ay labada qof wada hadlaan iskuna af gartaan in ay wada noolaan karayaan iyo in kale waxaa kal oo lagama maarmaan ah [illegible] qofba qofka kale [illegible]

DERSO dabeecadihiisa iyo dadnimadiisa, markaas ay ay laba qof ay isguursanaysaa ama isjeclaan karaan ama isdiidi karaan, laakiin jacaylka habeen ku ab uurmay ma jacayl baa, gabdhaha hadda waa ma habsa dayaal , ragga haddana waa wada horor, hablaha dhibaataada [illegible] la jecel.

Dayaca jacaylkeedii waqtiga dueer ay beeray say mirihiisana ay goosan lahayd, ayay ku badala tay Lacag iyo nin ay hal habeen ku baratay, waxaa se ka dambeeyay, iyadoon filayn ayaa furriin deg deg ah miiska loo saaray.

## TIIMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa waxaa soo baxaya Guryo waa weyn oo ka kooban dhowr dabaq, guryuhu waxay lee yihiin barxad weyn oo ka [illegible]esa, ayna yaalaan Ba abuur tiro badan, oo yar yar iyo waaweynba isugu jira, waxaa kaloo ay barxadu leedahay, Ubaxyo qu rux badan iyo kuraas fadhi macaan, oo martida lag u soo dhaweeyo, waxaa Kursi ka mid ah oo meesha yaalay ku fadhiya Danayste oo ka fikirayay, go'aan sadayna in ay Dayaca qeyr lahayn, wuxuu isku qaan cinayay, kuna eedeenayay in intii ay isqabeenba uu la kulmay qasoorin fara badan, wuxuuna maagan yahay inuu caawa iska furo.

Dayaca waxay ku maqnayd Magaalada, wa ay ka raadisay Filin ay caawa daawadaan ayada iyo duqee da Danayta ah, waxayna kaxaysatay Baabuur ka mid ah kuwii uu iyada siiyay, laakiin waxba kama oga isbadalka ku dhacay ninkeedii, doodii dhexmartay na waxaa ka mid ahayd.

DAYACA: "Alla xabiibii haddaad ogaan lahayd caawo filimkaan inoo keenay farxad baa Kursiga ka dhici lahayd, waa Filimkii Nasiib"

DANAYSTE:-"Ismoog, adigana nasiibkaa caawaa isugu keen damabaysa, filimka halkaa iska dhig, saacadaa laga bilaabana waad iga furan tahay"

DAYACA:- "Alla hoogi waynay, naa miyuu waashay caawa, misa wuu soo wadwadaa, ma kaa dhabaa hadda?"

DANAYSTE:-"Waligayba ma ciyaarin, sidaan kuu gu ursadayna saddex Markab ayaa badda ig aga degay, raafacaddaanad igu yeelatey, ee halkaa ka bax,iina dhaaf gurig a, kunkaa shilina qaado"

Dhawaaqaas ka bacdi Dayici waxay orod kaga baxday xaafaddii Danayste, iyadoon shayna ka qaa dan, waxayna ku noqotay, lama maqal iyo lama arag cohinteediina waxay qoysay, dharkeeda waxaana ka mid ahaa.

DAYACA:-"Ciilkani anaa is baday
carmal dhimatay baan ahay
calafkaygi wuu lumay
ragna ma an cammayn karo
camankaygan kogaybaan
u ciil kaambiyaayaa
caashaqaygi lumaybaan
caynkiisa leeyahay
cishadaan aroosaan
ciilkeed la ooyaa
caashaq lacagtaan dhaafsaday
maantay igu ciyaartoo
waataan ciil la kuudaduda
caqli xumadi Dumarbaa
caynkaa i yeeshaaee
Ilaah caadilaa jira"

Dayaca iyada oo sidaa u ooyaysa, ayaa waxaa soo gaadhaysa, Booyaysadii (Jaariyadii) gurigaoo wax xoogaa lacag ah iyo dharkeedii, danayste uga soo dhiibay, halkaasayna Booyaysadii ugu keenaysaa Dayaca, iyadoo aad uga xun sida loo galay iyo dhibaatada haysata, Dayicina waxay Booyaysada ka cod sanaysaa inay gurigii isaga laabato, si aan iyad ana loo eryin, halkaasayna ku kala tegayaan Dayaca iyo gabadhii.

Dayici ma taqaano meel ay tagto, waayo gurig ooda waxay ka tahay Dayro, guryaha kalana way ka xishoonaysay in ay tagto, sidaasayna rafaad iyo dhibaato ku mudanaysaa.

## ARAGGA LIX IYO TOBNAAD

KULANKII HAWEEYA, BILAN, JAMAAL, DHAQANE, MOOHANE, DAGE, IYO MAHAD.

Ilaahow nimaan wax ogayn ha cadaabin, Jamaal wuxuu maalintiiba sanduuqiisa boosta furi jiray ugu yaraan saddex jeer, nasiib daro waxba kama heli jirin, wuuna ku hungoobi jiray, Jamaal wuxuu aad u jeclaa Jamaad oo Waxbarasho dibadda ah ku maqnayd, siday u dhooftayna uuna wax waraaq ah ka helin, asagu had iyo jeer wuxuu u diri jiray wara aqaha, isaga oo cinwaankeeda ka helay dad kale, laakiin wax jawaab ah kama heli jirin, arrintaasi na waxay ku noqotay lama filaan iyo argagax,

## TIILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa soo baxaysa Boostada wayn ee Muqdisho-halkaasoo ay joogaan dad aad u tira badan, kuwaasoo iskugu jira, kuwa tilifoono dirsanaya, kuwa waraaqa dirsanaya iyo kuwa waraaqo kala soo baxaya sanduuqyadooda, dadkaa waxaa ka dhex muuqanaya Jamaal oo aad u murugaysan, kuna X

soo hungoobay sanduuqiisa, sidii caadadu ahayd wu xuu soo wari jiray Bilan ee ka shaqeysa Boosaada joogteyna qeybta Telekiska [illegible], hasiib wanaag Bilan waxay maalintaa u heysay war ku ku faraxsay, waxayna u sheegtay inay galabta Jamaad soo dageyso. Waxaa ka mid aheyd wareysigii dhex maray Jamaal iyo Bilan.

Bilan:- "Bishaaro, Bishaaro, war fiican baan kuu hayaa Jamaaloow, waxaanan kuu sheegayaa in ay galabta imaneyso Jamaad."

JAMAAL:- "Aad iyo aad ayaan ugu faraxsanahay warka fiican ee aad ii sheegtay, hadda ayaana u diyaar garoobayaa soo dhaweynteeda ee nabadgalyo!"

BILAN:- "Waa hagaage nabadgelyo, hadiyadana wax naga soo gaarsii."

HAWEEYA:- "Alla ba'nay, wiilka maxaa jacayl haya ismaba ogeyn markaad warka u sheegtay

BILAN:- "Haddaad ogaan lahayd mashmaha qaarkood naftaada ayaad u yaabi lahayd, maalintii ba saddex jeer ayuu i waydiin jiray.

HAWEEYA:- "Walaalay wax inaga saas inoo jeclaada maxaan u waynay."

BILAN:- "Naa inagu intaan dhaqan xumadii wadnay ayuu raggii naga wada beedhay, ee waa kuma ninka ina jeclaanaya, ma mid indho la'aa.

HAWEEYA:- "Alla maxaan qasaarnay, naa miyeynaan reero iyo caruur eenaan rabin, ma duli nimadaan baa ku dhamaysanaynaa nolosheena, naa aan isgaarno intay goori goor tahay."

BILAN:- "Naa sidan ku waari mayneeintaan Illahay utoobad keeno iyo waalidkeenii aan ku caasinay, waa inaan ka hadhnaa waxan.

HAWEEYA:-"H

HAWEEYA:-"Hadaad fikrad fiican keentay, ee ina gee Wiilashii dhaqan xumada ina baray eeni qabsanee."

Sidaa ayay ku heshiinayaan Haweeya iyo Bilan waxayna raadinayaan Wiilahsii ay caasiga isla ahaayeen, intay dhexda sii socdaan waxaa muuqanaya dhallinyaro dood ba'ani ka dhex taagan tahay, isk una haysta, dhaqan xumada ay faraha kula jiraan, waxaana doodii ka mid ahaa.

DHAQANE:- "Mahadoow saaxiibkeen wali wuxuu jecel yahay inuu dhaqan xumadii ku sii jiro wuxuuna damacsan yahay inuu saas sii a ahaado, caasigiina la sii socdo."

MAHAD:- "Waa wax waalan waxbana lama socdo, dhi baatooyinka haystana ma arkaayo, waxaa na kula talin lahaa taladan:

"Saaxiibkayga dhoohanoo
Waayahaan dhib baa yimid
Dumar caashaq loo dhigo
Waa la dhaagay Saaxiib
Gabadhii dhqaaqdee
Dhaayahay u roonina
Dhinac kalee la haysaa
Dhoolo ka qosol aan jirin
Afkee kuu dhalaalinao
Meel xunbay ku dhigayaan
Ee inaga dhaaf warkoodoo
Aan iska dhaafno Caasiga."

Iyagoo sidaa u doodaya wiilashii ayaa waxaa meeshaa imanaya Bilan iyo Haweeya oo raba inay caawa runta u sheegaan wiilasha lugooyada badan, waxaana doodoodii ka mid ahayd.

BILAN:- "Waryaada, waryaada! ilma caasiwaalidiin waxaan idinka rabnaa, quruxdayadii, sha raftayadii,iyo dhaqankayagii aad na see jiseen?

MAHAD:- "aadiyo aad ayaan ugu faraxsanahay hadaad caasinimadii dhibaatadeeda fahanteen, annaguna haddaan arrintaas isku haysanay

HAWEEYA:-"war waxaad na barteen, waxaad na badeen ayaa nagaga daran, wax noo dhowrsanina ma jiraan, ee iskakaaya dulqaada?

DHAQANE:-"Wallaahi markaan xasuusto waxyaabihii aynu ku dhaqmi jiray, waxaa i qabata oohin, bal inaY eega sidaan nahay, lebb iskeenna, socodkeenna, dhammaan waynaga beddelmeen, waxaana inagula dardaarmi l ahaa arrintan"Saaxiibayaaloow

saaqidnimo ma nololbaa
dhallinyaro ma sidanbaa
ma soo jeedka curubiyo
saqda dhexe wareegbaa
gabar suubanaan jirtay
sidaan inaynu yeelnaa
ma wax loo sabraabaa "

DHALLINYARADIID:-"Ma wax loo samraabaa! Maya,Maya!

Dhallinyaradu arrintaas way isku raacayaan, halkaasayna Caasinimadii iyo dhaqan xumadii kaga harayaan, waxayna go'aansanayaa in wixii dhaqan xumo wada ay la taliyaan, halkaasayna iska raacay aan iyagoo aad uga xun noloshii xumaad ee ay soo mareen, waxayna jecelyihiin inay dhaqankoodii iyo hiddohoodii soo nooleeyaan.

## ARAGGA TODOBA IYO TOBNAAD

## SOO DHOWAYNTII JAMAAD EE JAMAAL

Habboonaan lahaydaa haddii qof kastaaba sidu u jecâlyahay loo yeelayo, habboonaan lahaydaa had dii hablaha iyo wiilashuba, axdiga iyo ballanka ay ilaalin lahaayeen, habboonaan lahaydaa hadduu Jamaal,Jamaad helaayo, habboonaan lahaydaa in Daa cad ogaan lahaa , Jamaad inuu Jamaal u dhimanayo, malaha marnaba Daacad, kama meherseadeene Jamaal Saaxiibadii, Jamaadna way ka qarisay Jacaylkeedii ay Soomaaliya kaga timid, arrintu si kastaba ha a haatee waxaa eeddaas iyo dhibaatadaasha gaystay Dayaca, haddii ayna kaga bixi lahayn axdigii ay u qaaday Daacad, Jamaadna Daacad hunguri kama gale en, kamana meharsadeen Jamaal Saaxiibadiis.

Jamaal arrimahan dhacay waxba kalama socdo, in ay Jamaad xaaskii Daacad tahayna war kama ha yo, wuxuuna galabta isku diyaarinayaa, sidii uu u soo dhowayn lahaa Jamaadoo la sheegay inay soo degayso.

### TIIMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa soo baxaya garoonka Dayuuradaha ee Muqdisho, waxaa fadhiyay Diyaarada badan, kuwana I way ka duulayeen.

Jamaal wuxuu maalintaa ku mashquulsanaa aa soo dhowaynta Jamaad, daqiiqado ka bacdi waxaa s soo degaysa Diyaaradii ay la socotay Jamaad, Dig

Diyaaraddu markay soo caga dhigatay Garoonka Jamaal wuxuu is hayn kari la'aa Farxad, waxayna indhihiisu hayeen, albaabka Diyaaradda, sidii qof filim fiirsanaya oo kale, waayo, wuxuu ka dhex raadinayay dadkii ka soo degayay Diyaaradda Jamaad

Daqiiqado ka bacdi waxaa ka soo degaysa Day uuradda, Jamaad oo sidata Boorsa wayn, lebbisana dhar aad u qurux badan.

Jamaal markay indhihiisu qabtaan, Jamaad wu xuu ugu ordayaa sidii wax waalan oo kale, wuxuuna damacayaa inuu dhunkado, isagoo qoslaya, waxaase ka hor timid gacan iska difaacaysa dhunkashadiisa iyo weji aan naxariis lahayn, kalgacaylna ka muu qan, Jamaal layaab bay ku noqotay arrintaasi, wa xaana Hamid ahaa hadaladiisi.

JAMAAL:-"Abbaayo ima garanaysid miyaa?!, miyaadan Jamaad ahayn"?.

JAMAAD:-"Xaggeebaad magacayga ku baratay?, waadi gan sanka naga soo galayee?, afka ka ha dal dadka laguma dhegee!

JAMAAL:-"Isbeddel miyaa kugu dhacay abbaayo, int aad maqnayd, soo axdi maynaan lahayn?!"

JAMAAD:-"Haa!!haa!, haddaan ku fahmay, ma miski inkii Soomaaliya aan kaga tegay baad ah ayd, abboowe raalli iga ahaaw, xaas baan ahay oo ninbaan u mehersanahaye.

JAMAAL:-"waxaasi wax dhici kara maaha, ee ma anaa igu ciyaaraysaa?!.

JAMAAD:-"wax ciyaar la yiraah ma jirto, ee i dhe gayso runta aan kuu sheegee"

HEES

JAMAAD:-"Wiilyahow wareersane
Waqtiga aan la soconow
wixii jiray dhexdeennee
wacadka kuula eekaa
waa horaan ka tegayoo
wehel kalaan samaystee
wiiloow kuma aqaanee
wareerkaaga iga daa!



-107-

JAMAAL:-"Weris war iga hoo
waqtigaa wareegoo
waxaan aad samaysana
waa horuu rag soo maray
wax yeelada haweenkuna
waqtibay ku eegtahay
wax kastoo ad sheegtaba
wehelkaagu waa ani!

JAMAAD:-"Wiilyahaw ogsoonoow
waqti yuunan kaa lumin
wacadkani an soo galay
kama weecan karayee
webiyada jacaylkana
midbaa ila wadaagee
waar hooy kuma aqaanee
wareegaaga iga daa!

JAMAAL:-"Wehel Dumar nin moodaa
walbahaar ma daayee
waqtigaad maqnaydbaan
wehel nafta u waayoo
waayo badan aduunbaan
anu kaa war sugayee
wax kastoo ad sheegtaba
wehelkaagu waa ani!

JAMAAD:-"Oo ma qasabaa Jacaylku, bal waa kaase i soo daba dhaqaaq, hadaanan booliska kuu sheegin, kuna xidhin.

JAMAAL:-"Waa adduunyo hadaabad jacaylkeenii xarig iyo dagaal ku bedeshay!

Jamaad, wax dhegah uma dhigin cabashadii Jamaal waxayna kaga dhaqaaqday goob cidla ah,

Jamaal arrintaasi waxay ku noqotay la yaab iyo ciil, wuxuuna meeshaa ka tegay isagoo Haween oo dhan u xanaaqsan, kuna ballan qaaday inuu meesh uu ka soo gaadho kula dagaalamo.

ARAGGA [illegible] IYO [illegible]OBDAAD

KULANKII DAYACA IYO [illegible]AMAAL

Dayaca oo aad moodo Islaan afar dhal ah, dh ibaatada iyo ciilka haysta aawgeed, ayaa weli waxa ay ku sugan tahay dar xumo, nolol la'aan, hoy la'aan iyo garowsha la'aan dhibaatada haysata iyada oo bulshada ka wayday cid u garowda ama wax la qabata, waayo waxaa lagu eedaynayay inay damb iile tahay, kana eedoowday reerkoodii iyo qaraab adii kalaba, waxayna ku sugan tahay xaalad xun.

TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furaysa, waxaa soo baxaysa Dayaca oo calaacalaysa, meel cidla ah kaligeed.

Dayaca waxay xidhan tahay dhar aad u liita, diif xumina way ka muuqatay jidhkeeda, waxayna mar kasta xasuusanaysay, noloshii fiicnayd ee ay ku soo kortay, Jacaylkii Hooyadeed iyo koolkool intii reerkoodu ku soo koriyeen, waxaa kaloo ay xasuusanaysay, wiilkii ay jeclayd, axdigana ay ka qaaday, ballankii ay kaga baxday, sidaa dart eed waxay ayaamahan dambe ku sugnayd oohin aan wax ka qabasho lahayn, waxaana horay loo yidhi, "Waqti tagay tiigsimaad ma leh","Miyaa shalay la soo celin", Oohintii Dayaca waxaa ka mid ahaa.

DAYACA:-"Waheey lugooyooy
maxaan laab garaac sameeyay
maxaan laacib wiil ah laagay
maxaan laagaha ka heesay
maxaan been laxaad leh sheegay
maxaan ragga labalabeeyay
Adduunyo liciifsi badanaa
miyaan maantaba lalmanayaa?

Oohmintaa ka bacdi iyadoo madaxa haysata, hoosna u foorarta aysa meeshaas soo maraya Jamaal, oo ciilka haysta dartii wejigiisu is bedelay, aragga naagaha oo dhana dhibsanaya, ma rkuu Jamaal arko, Dayaca oo meel oi'dla ah ka ooyaysa, ayuu ku leexanayaa, si uu u ogaado bal waxa ku dhacay, wuxuuna waydiiyay su'aashan.

JAMAAL:-"Naa maxaa meesha ku dhigay, ood la ooy aysaa, ma Odaygibaa kaa dhintay?"

DAYACA:-"Imuu kaasi dhinto aad baan ugu farxi lahaa, waayo waa ka ciilkani baday, bulshadii iyo reerkayagiina iga dhex saay, dambi la'aana igu soo furay"

JAMAAL:-"Allaylehe abaalkaa, soo adiguba, ciil iyo murugo, ma adan badin, Daacad oo aad kuu jeclaa, saaxiibtaa Jamaad ma la socotaa waxay igu samaysay, iyadana waxaan u rejeynayaa in Duhur cad la soo furo, nabsigayguna qabto"

DAYACA:-"Jamaaloow adna ma sidaydaa kugu dhacday oo hadda Jamaad miyaa lagaa guursaday, ka warran haddaan booskii jammad kuu buuxiyo anigu"?

JAMAAL:-"ballan laawe waa diin laawe, wax naxar iis ahna iga sugi maysid, adiga iyo Jamaadna idinma arki karo, ee Wejigaaga ka dhaqaaq, intaadan wax kale isku arag"

Hanjabaadaas iyo xanaaqii ka muuqday Jamaal ayay Dayici ka cabsoonaysaa, iyadoo ka baqday in uu gacan u qaado, ayay meeshaas ka tagaysaa.

Jamaal isagoo weli u sii xanaaqsan haween oo dhan kana xun siday Jamaad u gashay, wuxuu yidhi"Lugooyada haweenkee

ragga lagu labaayaa

"Laagaha ka fara badan
Middaan laacdinteedii
naftaydii u luraybaa
sidaan iigu laadoo
waqtigaygá lumisee
laqdaba haweenkuba
lumis bay u badan tahay
waana lama illaawaan"

Calaacalkaas ka bacdi, Jamaal wuu iska samrayaa wuuna iska illaawayaa jacaylkii Jamaad, wuxuuna xasuusanayaa xikmadda ah"Dooni buuxdaaba bad ku dhaçday""Samraa sed hela,IWM"

## ARAGGA SAGAAL IYO TOBNAAD

## SOO NOQOSHADII DAACAD IYO SOO DHOWAYNTII JAMAAD

Laba maalmood ka hor ayuu Daacad taar soo diray, wuxuuna soo ogaysiiyay, Xaaskiisa Jamaad iyo waalidkiis inuu imanayo maalin dhow, haddaba waxaa soo dhowayntiisa maalmahanba isu diyaa rinaysay Xaaskiisa, waxaana la soo gaadhay maal intii Daacad iman lahaa.

Jamaad waxay kaxaysatay maalintaas Baabuur keedii Karaasiidada ahaa, ee Daacad u soo gaday Berigay Jaamacadda soo dhamaysatay kuna soo laabanaysay Waddanka, waxay damacsan tahay inay Daacad iyo alaabtuu sitaba ku soo qaado Baabuur kaas, waxaan iyaguna diyaar u ahaa soo dhowaynta Daacad waalidiintiis iyo reer xididkiis.

## TILMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa muuqanaysa Jamaad oo aad iyo aad u faraxsan, Garoonka wayn ee [illegible] dishana, kolba dhinac u socota, sugina [illegible] Diyaaradda iman doonta daqiiqad[illegible] la bacd[illegible] [illegible]

filaysay inuu ninkeedii la socdo, waxay u dheg taagaysay xiinka Dayuuradaha, waqti yar ka bacdi waxaa immanaysa Diyaaradii ay sugaysay, waxaana ka soo degaya ninkeedii, Jamaad riyadeedii waa u rumowday, waxayna orod iyo farxad ku salaantay ninkeedii, iyada oo isugu martay sidii Ilma yar iyo Hooyadiis oo muddo kala maqnaa, soona daadi hisay isaga iyo Boorsadiisii, waxaana dhex mart ay sheekadan.


JAMAAD:-"Alla Xabiibi Ilaahay ma ku nabad keenay, waabad nagu daahdaye"

DAACAD:-"Al-xamdu lillaahi, ilaahbaa mahad leh"

JAMAAD:-"Dhammaan reerkiina banaankay kuu taagan yihiin, si ay kuu soo dhoweeyaan.

Intaa ka bacdi Daacad iyo Jamaad waxay ka s soo baxayaan qolka baarista ee Garoonka, waxaana halkaa ku soo dhowaynaya Daacad dhammaanba dadki sugayay, waxaana laysku raacayaa xaggii magaalada

Daacad iyo Jamaad waxay wada raacayaan Baab uurka Jamaad ay waday, waxaana dhex maraysa shee kadan, intay dhexda sii socdeen.



JAMAAD:-"Aad baan ugu faraxsanahay ima[illegible] waayo habeen iyo maalin, ma [illegible] in, waxaana i hor iman jiray sawirkaaga"

DAACAD:-"Anigaba sidoo kale, waxaan ku sugnaa Ilaahoow mar uun yaa Jamaadoo nool ku tusa, waxaana ku riyoon jiray arooskeenna, iyo inagoo ubad dhalay"

JAMAAD:-"ah,ah, haddaba waxaan filayaa in aad alaabtii arooskeenna intii dhinayd wadid, dhakhsana u aroos gali doonno"

DAACAD:-"Wax inaga dhimman oo aan ka imid ma jiraan, aroosna waan galaynaa"

Sheekadaa ka dacdi waxay gaadhayaan gurigii Jamaad, halkaasoo soo dhowayntii qaybteedii dambe uu Daacad ku qaatay, habeenimadiina waxay aadeen Daacad reerkoodii iyo asaxgaabtiisii si ay u soo salaamaan, soo noqoshadoodiina waxay soo mareen golaha Murtida iyo Madadaalada oo ay ruwaayad fiicani ka socotay, Ruwaayaddaas oo ay galeen, waqtigoodiina ku soo dhamaysteen habeenkaas.

## [illegible] LABAATANAAD

## KULANKII DAACAD, JAMAAD IYO DAYACA

Dayici waxay jeclaan lahayd in aan laba [illegible] maqli lahayn in la aroosay iyo in kale, nasiibdarrose arooskeedu ma ahayn mid la qarin karo, furriinkeeduna ma ahayn mid qarsoonaa, dhibaatada, ciilka, qoomamada iyo arradka ka muuqday na ma ahayn mid qarsoomi kara, oo horaa loo yidhi"Ishaa macallin ah", Dayici way ogayd in la ogyahay xaaladeeda iyo dambiyeeda ay [illegible]

laakiin waxay jeclaan lahayd in Daacad iska cad iyo, kana dhigto Minwayn, maadaama ay maqashay in Daacad Jamaad mahersaday, maso ka ogolaanayaa Daacad arrintaas Dayaca.

TIIMAANTA ARAGGA

Daahaa la furayaa, waxaa muuqanaya golaha Murtida iyo madadaalada barxadda wayn ee ka sok aysa, waxaa taagtaagnaa Baabuur fara badan oo ay dhigteen, dad badan oo u socday Ruwaayad ka socotay Golaha, waxaa si isdaba joog ah u galay ay dad badan oo u badnaa dhallinyaro, una wada socday laba laba, saddex saddex, iyo koox koox, Dayaca waxay in mudda ahba raadinaysay siday ula kulmi lahayd Daacad, waxayna galabtaas ka raadi say gurigii uu ku soo degay, waxaasa loo sheegay in ay is raaceen Jamaad, caawana ay galayaan Ru waayad, sidaa darteed waxay ilaa fiidkii Dayici hor taagnayd golaha Murtida iyo Madadaalada, iyo siib wanaag waxay indhaha ku dhufanaysaa Daacad iyo Jamaad oo Baabuur ka soo degaya, una socda Riwaayadda. Waxaana dhex maraysa sheekadan.

DAYACA:-"Weey alla waa Daacad, abboowe maxaad sheegtay, ma nabad timid?"

DAACAD:-"Naa ha nasalaamin, Malaa'igtu kuma sal santee, axdi dilayahay"!

JAMAAD:-"Naa hooy! Hooy! runta ma kuu sheegaa, meesha ha ku meherad seegin" waar ina keen waqtiga yayna naga luminine.

DAACAD:-"Waxaan kuu hayaa, oo naxariis ihi ma jirto haba yaraatee, agtaydana kuguma arki karo, ee aan kula taliyee i dhegayso.

DAACAD"-"Takaryahay Tallaabada tiiq-tiiqinaysaa

Tukayahay [illegible] dilay
taladii [illegible] dhiganayna
tunka [illegible] ka jebiyee
tala seeg inaad tahay
[illegible]taaday ku qorantee
tufaaxyahow khasaaree
raggu wada tebaayaa
tamartaadi lumisaye
orod tiigso meel kale!"

JAMAAD:-"Naa hooy warku intaasuu ku dhan yahay
hadaad wax maqlayso, haddii kalana oy!"

Daacad iyo Jamaad, iyagoo gacmaha is hayst a, qosol iyo farxadina ka muuqato, ayay Miskiin tii Dayaca halkaa kaga tegayaan.

Dayaca iyada oo la yaabban, cajaa'ibka ga bsaday iyo arxan la'aanta Daacad, kana quusatay nolol wangageed, isuna aragtay in wax hadhay ayna jirin, ayay oohin dhafoorada qabsanaysaa, dad badan oo riwaayadda u socday ayaa oohinta Dayaca ku soo leexanaya, waxayse ogaanayaan, kana fahmayaan erayadeeda in ay tahay, naag Nabsi hayo, wax naxariis ahna-a uma ayna gelayn, Dayaca Oohinteedii waxaa ka mid ahaa. Heestan.

DAYACA:-"Caashaqaan tirtiraybaa
Ciilkan igu wacanoo
Anigaa iscuuryaanshoo
Caashaqaan ku dheelaa
Calooljowgan igu dilay
Cashardan ka tegaybay
naftu ciil la ooydaa
Waxa ay carmuruhu
Casarkii maqlaan bay
Cawayskii ku heesaan

Caynkaa haddaan ahay
Adiguna Canaadoo
ka cad gooso hays oran!

* * *

Caashaqaan ka tegayeen
ku ciyaaray waa hore
hadduu waawa cudur iyo
ciil kaambi igu riday
Calaf Eebbe weeyee
Wixii Caadil kuu qoray
Cidna baajin maysee
Adiguna Canaadoo
ka cad gooso hays oran!

Oohintaas iyo ciilkaas ayay meeshaas kala tegaysaa Dayaca, iyadoo aragtay dhibaatada nabs iga, heshayna abaalkeedii.



Ku kalsoonoow naftaada, lahowna mabda' adag iyo kalsooni shakhsiyadeed, ...

Xurmee dadka aad la nooshahay yar iyo wayn ba, si laguu xurmeeyo adigana.

Axdi ha qaadin hadaadan oofinayn, ogow ballanta iyo wacadkuba waa waxa kaliya ee la isku aaminee, ha ku sifoobin calaamadaha lagu yaqaano Munaafiqiinta.

Ogow guurku ma aha dheeldheele, ka fiirso Marwadii Mustaqbalka kula noolaan lahayd, ka fikir aayaha ubadkaaga iyo ka Oorida adaba.

Ogow Aadamigu laba qalbi malehee, hadaad Arday tahay naftaada iyo balwadaadu ha ku koobnaato ba waxbarashada oo kaliya, haddii kale waxaad ku dambaynaysaa saaqidnimo iyo aqoon la'aan

U adkayso duruufaha qallafsan ee Ardaynimada, hays raacin raaxada adduunyada, ha ka fikirin waxay awooddu kuu diido waqtiguna kuu ogolaan waayo, ogoow awoodda Ilaahaybaa iska lehe, isagaana og meesha kuu roon iyo waxaad ku dambayn.

Ma ogtahay in ragga iyo dumarku ayna kala maanti karin, isuna baahan yihiin, haddaba ha noqonin mid ku xad gudba xurmada ka dhexaysa ragga iyo dumarka, ha isku dayin in aad gabadh gayaankaa ah mustaqbalka kaga ciyaartid, hana isku dayin in aad kuu beerlaxawsato been aan meel marayn, adiga oo ka faa'iidaysanaya maahmaahda ah"Dumar been baa lagu soo xero geshaa runa waa lagu dhaqaa"

## MAHADNAQ

Waxaan mahad ballaaran u celinayaa dhammaanba dadkii gacanta igu siiyay soo saaridda buuggan, dadkaasoo kala-ah:-

1. Cabdullaahi Ciise Siyaad (Garaace)
2. C/Rashiid Ibraahim (Sawirada)
3. Axmed Xasan Maxamed
4. C/risaaq Maxamed Axmed
5. Maxamed Aadan Xasan
6. Maxamed Sheekh Cali Ibraahim
7. Ibraahim Sheekh Nuur

Waxaan mahad gaar ah u celinayaa Maxamed Cabdi Gurxan oo isagu si gaar ah iila shaqaynayay intii aan buuggan howshiisa waday.

Waxaanan isna marnaba illawayn Xaalintii uu ka qaatay Buuggan Xasan Xaaji Maxamuud Raage oo si gaar ah gacan buuxda igu siiyay soo bixîdda buuggan..

C/Naasir Sheekh Xasan Negeeye

(Q O R A H A)

# WALAALO AAN IS AQOON !!



Qore: C/naasir Sh. Xasan Nageeye

# WALAALO AAN IS AQOON!!

Waa qiso dhab ah, oo dhacday, waa qiso qofkii akhristaa uu kala kulmaid doono waxyaabo la yaab leh oo hore uuna u arag, wah qiso ay ku jiraan naxdin iyo faraxba.

Sheekadani waxay xambaarsan tahay arrin qoto dheer oo si wayn looga soo shaqeeyay, waxaadna kala kulmi doontaan arrimo idin cajab geliya, waxaana ku rejo waynahay in cidii akhriska buuggan nasiib u heshaa ay ka faa'iidaysan doonto

Waxaan rejeynayaa in uu buuggani soo bixi doono sanadkan bartankiisa, wuxuuna ku jiraa daabacaad.

F.G.

Waxaan akhristayaasha sharafta leh ka codsanayaa in wixii khaladaad ah ee ka soo baxa buuggan Tacliin iyo Tallaabo Jacayl ay u qaataan arrin ka timid xagga farsamada iyo qoraalka, wixii tala ah waxay iigu soo hagaaji karaan cinwaankan

P.O.Box. 7210

MUQDISHO
SOMALIA.

Daacad marna ma rabin in uu tacliinta iyo jacaylka is is dhex wado laakiin waxaa jacayl ku abuurtay Dayaca oo Ilaahay qurux iyo qaaya siiyay, maxaasa ka dambeeyey?

Bal ogow haddaba
Aaayaha jacayl
Aqoon lama tusoo
waysku ololayaan

Wax badan baan maqalnaa dood ka dhex taagan Gabdhaha iyo Wiilasha Qarniyadan dambe, waxaan maqalnaa erayga Caasi Waali-dayn, waxaan aragnaa in dhaqan bedel iyo dhalanteed ay wadaan dhallinyarada qaarkood, waxaan dareenaa guur la'aan iyo gaabsigii oo sii badanaya, eedda ma dumarkaa iska leh mase ragga, Buuggani wuxuu si faahfaahsan uga hadlayaa arrimahaas, wuxuuna taabanayaa runta jirta.

Waxaan buuggan ku tilmaami karaa mid u faa'iidaynaya dhallinyarada dhowrsan, dhaleecaynaya kuwa dhunsan, Qoraha buugani C/naasir Sh. wuxuu soo bandhigay qisadan cajiibka ah.

M.A.Gurhan.



C/naasir Sh. Xasan
Nageeye